# BAADIGOOBKA GUUSHA

## WADOOYINKA LOO MARO GUUSHA



*Xaglo laaban xoolo ku ma yimaadin*

# YAAN LAGAA BADIN !

**YAXYE YAASIIN XASAN**

**(ANSAARI)**

# BAADIGOOBKA GUUSHA

*‘Si aynnu u guulaysanno ugu horrayn waa in aynnu aaminnaa in aynu guulaysan karno.’*

*_nikos kazatzakis*

# YAAN LAGAA BADIN!

## YAXYE YAASIIN XASAN

## (ANSAARI)

# BAADIGOOBKA GUUSHA

©YAXYE YASIIN XASAN

Xuquuqda daabacaaddu way xifidantahay lama badsan karo si kasto oo loo dhigo, iyadoon oggolaansho loo haysan.

**DABCADDA KOOWAAD 2016**

**JIGJIGA, DDSI, ETHIOPIA.**

## TUSMADA BUUGGA

**Hibayn**……………………………………………………………………5

**Mahadnaq**……………………………………………………………............6

**Hordhac**…………………………………………………………….............7

Wiilkii yaraa ee guulaystay………………………………………………...8

Sirta guusha……………………………………………………………….11

**1. ASTAAMAHA GUUL LAGU GAADHO**

**1)** Kalsooni…………………………………………………………13

2) Aqoon……………………………………………………………14

3) dhaqan wanaag…………………………………………………..15

4) Iskaashi…………………………………………………………..15

5) Daacadnimado…………………………………………………...16

6) u roonaanta dadka……………………………………………..17

7) isxilqaanka………………………………………………………17

8) rajo san…………………………………………………………..18

**2. GUULDARRADA**

1) Guuldarrada……………………………………………………...19

2) Guuldarradu waa jidka guusha…………………………………..20

**3. ASBAABAHA KUU DIIDAN INAAD GUUL GAADHO**

1) Cabsida…………………………………………………………24

2) Cudurdaarka……………………………………………………26

3) Quusashada……………………………………………… …..30

4) Dib u dhigista iyo wahsiga……………………………………31

5) Guuldarrooyinkii hore…………………………………………...31

6) Aqoon darrada……………………………………………………………..32
7) Ka fikirida wixii tagay…………………………………………………..34
8) Saaxiibka xun……………………………………………………………35
9) Balwada…………………………………………………………………….36
10) Raaligalinta qof kasta………………………………………………..37
11) Adkaysi la'aanta……………………………………………………..38
12) Hurdada badan…………………………………………………………39
13) Caajiska……………………………………………………………...40

**4. WADOOYINKA LOO MARO GUUSHA**

1) Wadada koowaad: hanka…………………………………………………43
2) Wadada labaad: dhiirigelinta…………………………………………51
3) Wadada saddexaad: isbadel…………………………………………..56
4) Wadada afaraad: hadaf…………………………………………………63
5) Wadada shanaad: qorshe……………………………………………..66
6) Wadad lixaad: dadaal…………………………………………………67
7) Wadada todobaad: Samir iyo dulqaad………………………………..74

Tallooyin wax ku ool ah…………………………………………………..77

Tacab (gabay)…………………………………………………………......78

Odhaahyo murti ah (quotes)………………………………………………80

Gunaanadka buugga…………………………………………………………85

Tixraaca buugga……………………………………………………………..86

## HIBAYN

Buugan waxaa u hibaynayaa hooyaday macan xawo farax cade oo aan aad u jaceylahay, ahna qofta isoo barbaarisay oo isoo gaadhsiisay horumarka aan maanta ku naaloonayo iyo cidkasta oo baadigoobayso ama raadinayso wadada guusha loo maro, si ay u maraan wadada guusha taas oo gaadhsiinayso hiigsiga ay leeyihiin.

## MAHADNAQ

*"ILAAHAYOOW ILAAH KALE MA JIRO ADIGA MOOYAANE*

*ILAAHNIMADA KALIGAANA WAAN KUGU ADDEECNAAYE*

*ERGADAAD MUXAMED (NNKH) SOO FARTAAN KUGU AJIIBNAAYE*

*AXAD KALE MA TUUGNEE ADAAN KUGU EKAANAAYE."*

*_Qoraha lama yaqaan*

Mahad oo dhami waxay u sugnaatay allah rabul caalamiinta ah illaaha uunka oo dhan iska leh. illaaha ifududeeyay inaa qoro buugan ka hadalayo wadada loo maro guusha. intaa kadibna waxa aan u mahad celinayaa cidkasta oo gacanka gaysatay inaa qoro buugan soona saara ugu horeeyaan labadaayda waalid ku waas oo igu dhiirigaliyey inaa qoro buugan qaayaha leh had iyo jeerna igu taageerayay waxaan uga baahdo. Waxaan kaloo mahad gaar ah u jeedinayaa walaalkaay maxamed yasiin xasan (lixliqe) iyo walaashay sahra yaasiin oo igu garab qabtay si aan u soo saari lahaa buugan. Waxaa mahadnaq, tixgelin iyo xus gaar igu leh Iqra cumar sulub oo ah gabadh karti leh taas oo wax badan igu caawisay markaan qorayey buugan iyo saaxiibkay amiin cabdi yusuf oo ah shaqsiga iga qaaday sawirka jaldiga.Waxaan kaloo aan u mahadnaqayaa dadka kale ee iyaguna ka qayb qaatay dib u eegista iyo sixida buuga oo ay ka mid ka yihiin:

1) Ied Hussein muhumed
2) Iqra cumar sulub
3) Guuled cabdulaahi

**ALLAA MAHAD LEH.**

# HORDHAC

'In aad samayso wax aan dadka kale sameyn Karin waa karti, in aad sameyso wax aan kartidu samayn Karin waa hanadnimo.'

*_Will henry*

Qof waliba oo dunidan ku nool waxaa uu jacelyahay inuu gaaro guul waxaa uuna raadiyaa habeen iyo maalin sida ugaari lahaa waxaa uu hiigsanayo iyo wadaada uu mari lahaa guusha, si nolol raaxo leh ugu noolaado caalamkana wax ka badalo wax cusubna kusoo biiriyo. qof waliba naga mid ah waxaa ku hamiyaa caalamkan lnuu magac iyo maamuus ku yeesho intuu nool yahay iyo markuu dhintana dadka caalamka jooga aay xasuustaan ama quluubtoodu aysan illaawin. Haddaba iyadoo qof waliba sidaas ku haminayo ayay dadku waxaay u kala qayb samaan laba qaybood qaybi waxaay ku guulddaraystaan in aay hamigoogi ay san gaarin waxayna dhintaan iyagoo caalamka shayna ku soo kordhin ama wax ka badalin halka qaybta kalana ay awoodohooga isticmaalaan riyooyinkoodana ay rumeeyaan aduunkana wax cusub iyo fikir ay leeyihiin ku soo biiriyaan magac aan duugoobina kaga tagaan. Buuggana waxaa uu kahadlayaa inaad sidaad ugu biiri lahayd qaybta danbe, guulaystayaasha .

Si guudna Buugana waxaa kuu sahlayaa:

- Inaad ku guulaysato waxkasta oo aad rabto iyo wadaadaa u mari lahayd.
- Sidaad hankaaga kor ugu qaadi lahayd iyo sidaad u heli lahayd dhiirigelin joogta ah.
- Sidaad u yeelan lahayd yool iyo hadaf.
- Iyo sida ugu dhibta yar aad qorshe u sameysan lahayd.
- Sidaad u kasban lahayd Dadaal iyo dulqaad.

## WIILKII YARAA EE GUULAYSTAY

Markii uu Mark zuckerberg uu soo gaadhay magaalada Palo Alto afar sanno ka hor muu haysan gaadhi gaadhsiiya gurigiisa amma shaqo uu qabto, si uu u helo wax uu ku noolaado. Si aannu sawirkani inoogu noqon mid mala awaal ah, Mark zuckerberg manta waxa uu ka mid yahay dadka hoggaanka u ah bogga dadweynuhu ku kulmo ee Facebook.com oo ku caanbaxay in dadku ay ku wada xidhiidhaan. Waxaannu diiday gacan kasta oo u soo bandhigta inay ku maalgashato bilaayiin dollar. Ma rumaysan kartaa arrintaa? Saddexdii sanno ee ugu dambeeyey bogga Facebook oo aan haysan xataa guri kirro ah oo loogu soo hagaago, ayaa noqday mid ay soo dhaweeyaan oo ay ka helaan xafiisyada ugu waaweyn adduunka. Nolosha wiilkani waxay u eeg tahay sidii sheeko filim oo kale, tiknoolajiyada noocan ahna wuxuu bilaabay intii uu ku jiray waxbarashadiisa jaamacadeed. Qol (dorm) ka mid ah dhismaha jaamacaddii uu dhiganaayey ee Harvard ayuu ka bilaabay hawlgalkiisa, fakir uu doonaayey in uu bulshada oo dhan wada gaadho, taas oo soo jiidatay indhaha dad badan. Ardeyda jaamacaddu waxay bilaabeen inay si joogta ah ugu soo dhawaadaan qolkiisa, iyaga oo doonaayey in ay shakhsi ahaan ogaadaan waxa uu ku mashquulsan yahay, waxa kaga soo baxay ardeydii qolkii uu ku jiray Mark fikir ka dhigay Superman oo si kooban adduunka u gaadhay. Bilawgii fikradan waxa uu ka bilaabay bog ay ku wada xidhiidhaan ardeyda jaamacadda oo kaliya waxaana loo bixiyey Networking Site, haseyeeshee iminka dadka ku wada xidhiidha waxay ka badan yihiin kontan milyan oo qof (50,000,000) oo ay ku jiraan shaqaalaha laamahaha dawladaha iyo shirkadaha waaweyn. Maalin kasta waxa soo booqda boggan dad aad uga tirro badan dadka si joogtada ah u isticmaala. Mid ka mid ah shirkadaha qiimeeya dhaqdhaqaaqa internet-ka ayaa ku tilmaamay Facebook inuu yahay bogga 6aad ee ugu isticmaalid badan Maraykanka dhexdiisa, taas oo micnaheedu yahay in 1% waqtiga internet-ka

lagu bixiyo la dul fadhiyo Facebook. Sidoo kale shirkadaasi waxay tilmaantay inuu Facebook ku jiro kaalinta koowaad, marka la eego dhinaca isku gudbinta sawirada, maalin kastana waxa la isku waydaarsadaa in ka badan lix milyan (6000,000) oo sawir. Facebook wuxuu tartan xawli ah kula jiro barta macluumadka laga raadiyo ee Google, Flickr iyo shirkadaha kale ee hormoodka u ah tiknoolajiyada ee ay daah-fureen dhallinyar da'doodu aad u yar tahay. Dadka fallanqeeya arrimaha dhaqaalahu waxay tilmaameen tallaabooyinka uu ku socdo bogga Facebook in sannad kasta macaashkiisu noqonaayo boqol milyan oo dollar ($100,000,000), taas oo soo jiidatay indhaha suuqyada. Daah-furaha shirkadda Facebook waxa ka horyimi tartan iyo loolan adag oo uu adduunka la galay, taas oo dadka dhaliilaa ku tilmaamaan inuu suuqa ku soo galay si aan sharci ahayn, waxase lagu tilmaamay inuu waligiiba ahaa qof kaligii socod ah. Mark wuxuu ku barbaaray xaafadda ay degaan dadka hantida badan ee Dobes-fibric oo ku taal magaalada NewYork, waqtigii uu yaraana wuxuu bilaabay inuu ku ciyaaro kombuyuutarada gurigooda yaala, taas oo u sahashay inuu si fiican u barto barnaamijyada uu ka kooban yahay kombuyuutarku, isaga iyo nin ay saaxiib ahaayeen, ayaa soo saaray barnaamij qayb ka ahaa MP3 oo ay u bixiyeen Winamp oo ay ugu talagaleen inuu sahlo dhegaysiga muusiga. Arrintani waxay soo jiidatay oo ay muhiimad weyn u noqotay shirkaddo waaweyn oo ay ka mid yihiin shirkadda Microsoft iyo American Online oo u soo bandhigay in barnaamijkaa ay ku darsadaan telefoonada

gacanta ee ay soo saaraan. Bogga Facebook.com, wuxuu hawada si rasmi ah u galay 4 February 2004-tii, kaas oo ay booqdeen kala badh ardeydii jaamacadda dhiganaysay, muddo laba toddobaad gudahoodna waxa booqday saddex meeloodow laba meelood. Muddo ka dibna waxa ku soo biiray saaxiibadii Dustin Moskobitz iyo Chris Hughes oo ka caawiyey inay ku kordhiyaan qalab si fiican ugu shaqeeya oo u fududaynaaya dadweynaha adeegsanaaya booqashada boggan.

Ardeydaydii dhiganaysay kulliyadaha kala duwan ee Jaamacadda Harvard waxay jeclaadeen inay ku soo bandhigaan boggan taariikho kookooban oo ay leeyihiin iyo sawiradooda. Arrintaas oo dhiirigelisay in ardeydii jaamacadaha kale ay ku soo biiraan, sida ardeydii Jaamacadda Stanford. Markii la gaadhay bishii May dadka adeegsaday boggan, waxay ka koobnaayeen soddon jaamacadood, faa'iidada kaliya ee ka soo gali jirtay mulkiilaha boggan, waxay ahayd marka lagu baahiyo ogaysiisyada iyo hawlgalada ay leeyihiin ardeyda kala duwan ee dhigata jaamacadahaas. Lacagta ka soo gali jirtay xayeysiisyadaas, waxa lagu qiyaasay kumanaan dollar. Markii uu arkey Mark Zuckerberg guusha uu gaadhay, hadaladii uu yidhi waxa ka mid ahaa; "Waxaan rajaynayaa inaan safar ku tago California, si aan fasaxayga halkaas ugu soo qaato oo aan u dabaal dego guusha layaabka ah." Dabayaaqadii sannadkii labaad ee jaamacada oo ah sannadka oo uu daboolka ka qaaday bogga Facebook.com, wuxuu go'aansaday inuu joojiyo sii wadida jaamacadda, isaga oo door biday inuu hawlgal weyn ku sameeyo ballaadhinta boggiisa, waxaannu tagay magaalada Paola Alto, isaga oo ay la socdaan labadiisii saaxiib ee Moskobitzio Hughes, waxaanay kiraysteen dhisme, iyaga iyo Sean Parker oo ah ninka aasaasay bogga lagu kaydiyo faylasha ee Sharing Service Napster, dhismahaasi wuxuu u dhawaa jaamacadda Stanford oo dhallinyarta aadka u isticmaashay Facebook ay ku tilmaameen inay ahayd meeshii digaagadu ay dhigtay beedka dahabka ah. Bishii July sannadkii 2004-tii, shirkadda iyo bogga Connectu waxay dacwad ka dhan ah ku soo ogeen Mark Zuckerbergoo ay ku eedeeyeen inuu ka xaday dhammaan hawlwadeenadii khubarada ahayd ee shirkadooda, si uu ugu hormariyo boggiisa gaarka ah. Haseyeeshee, ilaa iminka dacwadaas si rasmi ah looma qaadin. Mark Zuckerberg, wuxuu eedayn taa la mid ah u soo jeediyey shirkadda Connectu oo uu ku tilmaamay inay ka xadeen xeerarkii gaarka ahaa ee boggiisu lahaa oo ay ku horumariyeen boggooda iyo arrimo gaar ah oo ay leeyihiin Sidaa darteed, dacwadaasi waa mid ilaa waqtigan ka

dhaxaysa Facebook.com iyo Connectu. Maalgelintii ugu horreysay ee lagu sameeyo Facebook waxa bixiyey aasaasaha shirkadda Paypal ee Peter Thiel, isaga oo bixiyey lacag xaddigeedu dhan yahay shan boqol oo kun oo dollar ($500,000). Sannadkii 2005-tiii bogga facebook, wuxuu soo jiitay indhaha shirkaddo badan oo ay ka mid tahay shirkadda Accel Partners oo si rasmi ah ugu maalgelisay 127 milyan dollar (Boqol iyo toddoba iyo labaatan milyan oo dollar). Sannadkii 2006-dii Facebook wuxuu u oggolaaday ardeyda jaamacadaha inay ku soo daraan saaxiibadooda kale, bil kadibna waxa soo baxday warar tilmaamayey in bogga Facebook ay iibsanayaan shirkadaha waaweyn ee adduunka. Haseyeeshee, isla bishaas bogga Facebook waxa uu dib-u-habayn weyn ku sameeyey qaab-dhismeedkii uu u samaysnaa oo ay ku soo kordhiyeen horumar aad u ballaadhan. Sannadkii 2007-dii, ayaa mar kale lagu sameeyey Facebook horumar ballaadhan oo ka yaabisay shirkadaha waaweyn. Shirkadaha qaybta ka iibsadayna waxa ka mid ah shirkadda Microsoft oo bogga ay ku leedahay siisatay $240,000,000 (Laba boqol iyo afartan milyan oo dollar), waqtigan xaadirka ah bogga Facebook waxa uu la ciirciirayaa xayeysiisyada iyo iidhehda shirkadaha ugu waaweyn adduunka oo bil kasta siiya malaayiin dollar.

## Sirta guusha

### Sheeko xikmad leh: Sirta guusha

waxaa jiray wiil dhalin yaro ah kaas aad u jacelaa inuu mar noqdo qof guuleysto, balse ma uusan garaneyn sida uu ugu guuleysan lahaa waxa uu doonayay inuu gaadho oo ah guul. maalin ayuu la kulmay nin oday ah oo waayo arag ah, noloshana wax badan ka soo arkay Wiilkii odaygii waayo araga ahaa ayuu la sheekeystay, xoogaa kadib wuxuu weydiiyey su`aashii maskaxdii sa ka dhex guuxaysay oo aheyd “waa maxay sirta guushu?” ninkii odayga ahaa wuxuu ku

yidhi wiilkii waan kaaga jawaabayaa ee aan barri isugu imaano qarka wabiga, sidaas ayaana lagu balamay oo lagu kala tagay. Maalintii balanta markii la gaadhay oo labadoodiiba soo xaadireen wabiga ayaa ninkii waayo araga ahaa ku yidhi wiilkii ina keen aan biyaha galnee, biyihii ayey galeen makii ay badhtamaha wabiga gaadheen ayuu ninkii weynaa madaxa ka qabtay wiilkii yaraa isagoo hoos biyaha ugu riixayo, wiilkii xaaladii ayaa ku adkaatay ilaa ay indhihii casaadeen, wax yar kadib ayuu sii daayay, wixii ugu horeeyay ee uu sameeyo wiilka yar markii la sii daayay waxay ahed in uu madaxa kor ula soo baxo oo uu neefsado. ninkii odayga ahaa ayaa wiilkii weydiiyey markii aad ku jirtay biyaha oo aan madaxa kaa hayay, maxaa aheyd waxa aad ugu jecleyd inaad hesho wiilkii ayaa ku jawaabay, hawo si aan u neefsado. odaygii ayaa yidhi hadaba su`aashaad shalay iwaydiisay jawaabteedii waa tan, waxa aad dooneyso inaad ku guulaysato ilaa aad u raadiso sida aad u raadineeysay hawada markaad biyaha ku jirtay kuma guulaysanaysid, sirta guushuna waa taas.

*'inaad guul gaarto uma baahna inaad garab ka sugto ruux kale ee waa inaad garataa inaad garab isku tahay oo aad kaligaa wax qabsan kartid.'*

*_Iqra cumar sulub*

**Toddobada D (7D) ee guusha lagu gaadho**

1) DadaaL
2) Dulqaad
3) Dabeecad wanaag
4) Dabacsanaan
5) Daacadnimo
6) Deeqsinimo
7) Dad la socod

## ASTAAMAHA GUUL LAGU GAADHO

Dadka guulaysata waxa ay leeyihiin astaamo ama dhaqamo aad u fara badan dhaqamadaas ayaa u hor seedo in ay naftooda horumar gaadhsiiyaan kadibna caalamka wax ku soo kor dhiyaan, hadaba waxaan soo qaadan astaamahaas kuwoo ga ugu waawayn. astaamahan adigu naftaada ku dabiq si aad hormar la taaban karo u gaarto astaamahana waxaana ka mid ah:

### 1. KALSOONI

Kalsooni: waxa weeyaan in aad u aragto naftaada mid wax soo saari karto ama wax soo kordhin karta guulna gaadhi karta. naftaada markaad ku kalsoonaato ayaa hiigsan kartaa waxaad rabto. waana furaha ugu muhiimsan ee guusha lagu gaadho.

*'Hal fure oo muhiim u ah guusha waa kalsoonida, hal fure oo muhiim u ah kalsooniduna waa diyaargarowga.'*

*_ Arthur Ashe*

Kalsoonidu waxaay ku siinaysaa awood aad hawl ku qabato taasina waxeey ku hor seedi kartaa in aad si dhib yar aad u guulaysato. Kalsoonidaas oo kuu horseeda horumar wayn taas oo kaa dhigaysa ruux ku haboon xaqiijinta hadafkiisa, naftaada oo aad ku kalsoonaataa waxaay ay kaa dhigaysaa mid wax walba qaban kara.

*'Hadii aad naftaada kalsooni siisid waxaad jiidi kartaa ku dhawaad wax walba.'*

*_Katy Perry*

Naftaada ku kalsoonow waxaa aad ta qaannaa wax ka badan waxaa aad u malaynaysid in aad taqaaanid dadkana ku kalsoonow, in aad dadka ku kalsoonaato waa shay loo baahan yahay maxaayeelay hadaadan dadka ku kalsoonaani

naaftaadana kuma kalsoonaan doontid iskana ilaali gabi ahaan ba erayga kalsoonidarro.

**Sheeko xikmad leh: kalsoonida**

Aabbo ayaa gabadhiisa oo yar ayuu dalxiis geeyay si ay u soo daawato beeraha, xayawaanada iyo wabiyada, iyagoo dul socdo buundada(biriijka) ku dul yaala wabiga dushiisa ayuu gabadhii abbaheed ku yiri aabbo gacanta I qabso sidaadan ugu dhicin wabiga. gabadhii yareed oo ahayd gabadh illaahay xikmad wayn siiyay ayaa waxay ugu jawaabtay aabbo adigu iqabo maxaa yeelay laga yaabaa in aan kaa siibto hadaan anigu ku qabsado laakiin kaama siibanayo hadaad adigu I qabato gacanta. “ kalsoonida aad u hibayso dadka kaa mudani waxay kaa bad baadisaa hadimooyinka.”

**Ahaw naftaada**

Inaad naftaada ku kalsoonato oo aadan cidna la barbar dhigin waa jidka guusha.

Ha ka dayrin waligaa

Noloshaad la daris tahay

Ha u doodin abidkaa

Mid kaloo ku dayasho ah

Abwaan maxamuud tukaale cismaan

## 2. AQOON

Aqoontu waa furaha guusha waana midka mid ah astaamaha lagu gaadho guusha aqoontu waa iftiinka nolosha waana miisaanka uu qofku ku kala soocayo guush iyo guuldarada, samaanta iyo xumaanta.

*‘Aqoon la’aan waa iftiin la’aan.’*

*_Murti soomaaliyeed*

Aqoontu waa anshax waa edabta waa anfac waana shayga ugu qaalisan oo uu qofi hanti ahaan u leeyahay waana shayga kuu sahlayo in aad gaadhid himiladaada tusaale hadaad tiraahdo waxaan doonayaa inaan noqdo wariye oo aadan baranin cilmiga saxaafada waad ku guul daraysanaysaa inaad noqoto wariye fiican si aad guul uga gaadho mihnadaada waa in aad marka hore baratаа cilmiga saxaafada. raadinta aqoontuna waa sir ka mid ah siraha guusha lagu gaaro.

## 3. DHAQAN WANAAG

Hadaad rabto inaad guulaysato waa in aad dadka si fiican ula dhaqanto kana fogaatid in aad dadka kula dhaqanto dhaqamo xun xun. Dhaqanka wanaagsan waxaa uu kaa dhiga yaa mid bulshada uu ku dhax nool yahay ixtiraaman. nooloshiisana ku guulaysta.

*‘Anshaxu waa birishka u dhexeeya yoolka iyo guusha.’*

*_ Jim rohn*

## 4. ISKAASHI

*‘Wada shaqayntu waxa ay yaraysaa hawsha waxa ayna badisaa guusha!’*

*_Qoraha lama yaqaan*

Bulsho wax aay horumar ku gaadhaa iyadoo dad keedu is kaashado oo isku kalsoonaadan. iskaashigaasina wuxuu u hor seedaa midnimo iyo wada jir meesha midnimo taalo guuli waataala maxaayeelay iskaashato ma kufto. Taasna waxaa inoo iftiiminaya gabaygan:

Taageeraday labo gacmood tamar ku yeeshaane

Tiska waxaa la qaadaa markay tiirisaa bidixe

Hadday midigtu keli taagan tahay tahar ma goyseene

Mar kale waa iyadii iskaashiga laga lahaa:

Xaajadu ma gobol oo ma gobol, haysku ganac goyne

Gobolkeed gugii hore wixii go`ay ha loo daayo

Gawdhagawdh yar baa nagu haree aan idiin gaadhsiino

Dabadeedna geeshadda sidii gacal haloo aa`o

Nin gooni uma ciidamee gacal ha lays moodo

Markaad rabto inaad hawl guul ka gaadho waxaa fiican in aad dadka la kaashato oo aadan kaligaa isku gaar yeelin maxaa yeelay far kaliya fool ma dhaqdo hadaad dadka la kaashato hawshaada waxaad ka faa`iidi. in aad hawsha si dhib yar u qabatid iyo in wakhtiga oo ah halbeega nolosha qofku uu kuu noqdo mid aadan ka qooma mayn.

*‘Ma qabsan karno wax yaalaha aynnu rabno anag oo wadajirna mooye.’*

*_Qoraha lama yaqaan*

## 5. DAACADNIMO

Daacadnimadu waa tilman ka mid ah tilmaamaha ay leeyihiin dadka guulaysto waxay daacad u yihiin naftooda, dadkooda iyo dalkooda ma khiyaamaan dad kooda maxaayeelay waxeey ogsoonyihiin in khayaanadu ay ku soo dul noqoto khaa`inka laftiisa. Khaa’inkuna uun san liibaanin.

**Sheeko xikmad leh: khiyaanada**

Nin baa yiri war ninyahoow qiyaanada i bar markaas ayuu ninkii caqliga badnaa ku yidhi waa yahay horta hashaada isoo lis, markii uu usoo lisay ayuu ku yidhi hadaba waanigaa kuu soo lisee khiyaanada ibar markaasu ninkii caqliga badnaa yidhi dee wa anigii ku baray.

Waa maxay dulucda sheekadu ?

## 6. U ROONAANTA DADKA

**Sheeko xikmad leh: wax u tarka dadka**

Gandhi ayaa hada ka hor raacay tareen. markuu lugta hore la helay ayuu tareenkii dhaqaaqay, kadib mid ka mid kabihiisi ayaa dhulka ku dhacday mana fududeyn inuu kabta soo qabsado illeen tareenku joogsi ma lahane Gandhi wuxuu durbadiiba ku dhaqaaqay inuu kabtii kalena ku tuuro halkii ay tii hore ku dhacday, dadkii tareenka saarnaa oo aad ula yaabay falkaas, una haystaan Gandhi inuu caqlidarro sidaas u sameeyay ayay waydiiyeen waxa kabtiisii oo ka dhacday ku kalifay inuu tii kalena ka daba tuuro sidaasna ku kabo beelo. Si sahlan buu ugu jawaabay kabtii hore sooma ceshan karo oo ma awoodo waxaan se awoodaa nin hindi ah ee kabtaas heli doona aana ku caawiyo inuu tan labaadna la helo oo sidaas uu laba kabood oo ku socosho iyo labisgal ah u helo!

## 7. ISXILQAAN

Isxilqaanku waa inaad wax kasta oo kugu waajibay inaad ka soo baxdo duruuf kasta oo jirta aanay kaa hor joogsan, caqabad kasta ama dhib kasta oo kaa hor timaada aanad u joojinayn, dibna aanad u noqonayn ilaa guushaada aad ka soo taabato.

## 8. RAJO SAN

Rajada sani waxaa weeyaan waxaa ku tusayo mustaqbalka waxaad noqon lahayd qofkasta oo guul inuu gaadho rabo waxaa laga rabaa waxaa uu doonayo inuu guul ka gaadho inuu dhinaca fiican ka eego rajaystana wax fiican oo uusan ka eegin dhanka taban ama xun maxaa yeelay hadii waxaa aad rabto inaad ku guulaysato aad ka eegto dhanka xun waxaay noqonaysaa baasaysi. baasaysiguna waxa uu ka midka yahay asbaabaha ugu waawayn ee kuu diidan inaad noloshaada ka gaadho guul aad ku faraxdo.Waanad kartaa rajadaada inaad rumayso kaliya waxaad la kaalaydaa dadaal iyo dulqaad iskana ilaali baasaysiga .

*'rajadu waa awoodda lagu arko inuu jiro iftiin aanu sameyn dhamman gudcurku.'*

*_desmond tutu*

Rajadu raasaamaalka nolosha weeyi
Rabitaanka nafta riyadeeda weeyi
Rukunka raaxada lagu rarto weeui
Rafaad baa ku raran wax aad ragaatidba runtii marbaad
Raaxadeeda rarataa roobaanteeda naftu raali ku noqotaa
Rabi ruuxda haduu daayo

Cabdifatax cateeye nuur

## GUULDARRADA

*'Ma jiro wax la yidhaahdo guuldarro. waa laba mid uun in aad guuleysatay ama in aad waxbaratay.'*

*_Kevin kruse*

Guuldarradu waa cashirka ugu muhiimsan ee lagu barto wadada loo maro guusha maxaa yeelay qofku marku guuldaraystay waxaa uu bartay gafafkiisi iyo khaladaadkiisi uu ku guuldarraystay kadibna baaritaan ayuu ku samayni markay u soo baxdo ama u kala cadaato sabaabihii dhaliyay guuldaradiisa waa u ka weecan wadadii hore uu ku guul daraystay. waxa uuna qorshayn wado cusub taasi oo guul gaadhsiisa.

**Sheeko xikmad leh: guuldarro**

Wiil: maxaa kuu suura galiyay in aad guulaysato ?

Guulayste: waxa ii suura galiyay go'aan saxan oo aan qaatay.

Wiil: go'aan saxsan sidee ayaad ku heshay ?

Guulayste: waxa aan ku helay khibrad iyo waaya aragnimo aan kasbaday.

Wiil: oo khibradda halkee ayaad ka heshay

Guulayste: waxa aan ka helay guuldarradaydii ama fashilkaygii hore.

- ❖ Waa maxay dulucda sheekada ?
- ❖ ma dhihi karnaa guuldarradu waa xirfad ?

Hadaba adigu akhriste maad ka qaadataa guuldarradaada duruusta ku jirta. sida inaad fahanto sidey ku timid iyo inaad mar labaad isaga ilaaliso. hadii aad guul doonaysid waa in aad ka faa`iidaysatid duruursta guuldarrada ku jirta.

*‘Ninka guul soo hoyn doona wuxuu ka faii`deystaa qaladaadkiisi hore wuxuuna isku dayaa in uu waddo tii hore ka duwan qaado.’*

*_Dale carnegie*

Gaadhida guulahaad hiigsanayo waxaa ka horeeya guuldarooyin farabadan, caqabado iyo hadimooyin hadaba markay kaa horyimaadaan caqabadahaasi ha niyad jabin! hana quusan! Isku day in aad xaliso caqabad kasta si tartiib ah adiga ayaa guulaysaniye. ogsoonaaw guuldaradu ma aha in aad kuftid balse waa in aad diidid inaad kor u kacdid.

**Guuldarradu waa jidka guusha**

*‘Kuuma suurragal aha in aad ka cabsatid guuldarrada waayo waa jidka kaliya ee kugu ridaya guusha !’*

*_ Lebron james*

Guuldarradu waa jidka ugu wayn ee lagu gaadho guusha waa hadii aadan quusanin iska ilaalisana niyad jabka. Bal aan kaaga sheekeeyo dadka taariikhda galay iyo guuldarrooyinkii markii hore ay la kulmeen iyo siday ay uga gudbeen.

**ALBERT EINSTEIN**

Albert Einstein wuxuu dhashay 14 march 1879kii wuxuu ku dhashay jarmalka hooyadii iyo abbihii waxaay ku dareen iskuul laakiin waxaa uu ahaa dibjir waxaa uu ku dhacay imtixaano farabadan, macalimiintiisuna waxay maalin kasta ka caban jireen dabeecad xumadiisa iyo dibjirnimadiisa waxaa uuna hadalka caadiga bilaabay markuu afar jir ahaa. Yaraantiisi wax muu akhrin Karin ilaa uu toddoba jir gaadhay wiilkii yaraa ee sidaas u guuldaraysan jiray waxaa uu soo saaray qawaaniin cusub oo physics ah, wuxuuna sidoo kale soo saaray hubka casriga ah

ee loo ya qaano nuclear-ka, muuq-baahiyayaasha, computarada iyo aalado badan oo aan maanta isticmaalno waxay ka soo burqadeen aragtiyo fiisigis oo isagu la haa waxaa uu noqday saynisyahanka qarnigii tagay.

**MICHAEL JORDAN**

Waa ciyaaryahan kubadda kolayga caan ku ah gaar ahaan horyaalka (champion) loo yaqaan NBA, waxaana uu ku guulaystay lix jeer oo horyaalka NBA, shan jeer NBA MVP iyo afar  jeer oo NABB all star ah, laakiin markii uu yaraa wuxuu la soo kulmay guuldarrooyin farabadan waxaa laga eryay kooxdii uu u ciyaari jiray, marku dugsiga sare dhigan jiray taasina waxaay sababtay in uu muddo gurigooda qolka mid ah hoosta iskaga soo xidhdo kana soo bixi waayo, isagoo oohin miciinsanayo. Dhiirigalin naftiisa uu siyaay, dadka kalena ka helay ayaa maanta ka dhigtay ciyaaryahanka ugu caansan kubbada kolayga. Mar la waydiiyay  siduu u guulaystay iyo sababtii ka danbaysay inuu guulaysto ayuu yidhi:

*‘Waxaan soo guuldarreystay marar badan taasina waa sababta aan u guulaystay.’*

**HENRY FORD**

Henry ford wuxuu noloshiisa ka bilaabay meel hooseysa in ka badan shan jeerna wuxuu sheegay in uu kacay oo uu ku guuldaraysatay hiigsigiisi. Dadaal iyo isaga oo quusan ayuu ku hantay inuu yeesho shirkada gawaadhida ugu fiican aduunka ee FORD soona saarta malaayiin babuur ah sanad kasta. wuxuuna guuldarada ka yidhi:

‘Guuldarradu waa keliyaata fursad labaad si aad mar labaad u bilawdid, balse markan xariifnimo dheeraad ah ayaa lagaa rabaa.’

## STEPHEN KING

Stephen king waxaa u ahaa macalin dhiga iskuul ku yaala baadiyaha lagu magacaabo maine, buugiisii ugu horeeyay uu qoro u guna magac daray **iconic thriller carrie** waxaa diiday ilaa sodon shirkadood in ay daabacaan intaa kadib waa uu ka quustay waxaana uu ku tuuray buugi qashinka laakiin xaskiisi ayaa qashinkii buuga ka soo uruurisay oo u dhiibtay kuna tidhi isku day marka sodon iyo kowaad iyadoo ku dhiirigalinayso in uu waligii is dhiibin. markii sodon iyo koowad buu ku guulaystay in loo daabbaco. maantana stephen king waa qoraa caalamka oo dhan laga yaqaano buugaagtiisana loogu iibsiga badan yahay wuxuuna wax ka qoraa sheekooyin isagu alifo (novels).

## YAXYE .Y

*'Guuldarradu ma aha quusashada ee waxaay ku bareysaa wadooyinka guusha loo maro.'*

*_Yaxye yaasin xasan*

markii aan yaraa abbahay ayaa igu dhihi jiray habeenkii halkaa fariiso oo qor toban ama shan iyo toban shey oo ka mid ah akhlaaqda wanaagsan abbaheeyna waxuu uga danlahaa inaan barto afsoomaaliga, farta, yeeriska iyo sida xikmada loo curiyo laakiin anigu maan wada qori jirin layliska aabbo iidiri jiray maxaa yeelay aad ayaan u yaraa. Caqli igu filan maan lahayn in taas ka dib markii aan waynaaday ayaan maalin buugga iyo qalin qaatay is irina aabbo shan iyo tobankii shay ee akhlaaqda wanaagsan uu kuu diri jiray markaad yareed hada qor isla markiiba intaan yar fikiray ayaan qoray maalintaa wixii ka danbeeyayna waxaan ogaaday inaan waxa curin karo ama aan qori karo waxaana igu dhalatay riyo ah inaan qoraa noqdo. nafteeyda habeen iyo maalin ba waxaan waydiin jiray had meey riyadaadu kuu rumoowi? hadaba si aay riyadaydu iigu rumowdo waxaan aas aasay urur

waxbarasho kaasi ay u jeedadiisu ahayd qorida buuggag afsoomaali ku qoran laakiin nasiib darro ururkii kama aanan mira dhalin caqabado badan awgeed. Fikirkii aan rabayna waan ku guuldarraystay intaas kadib waxaan go'aan saday inaan kaligay qoro buug. waxaan qoray buug yare ka hadlayo taariikhda soomaalida laakiin iima suura galin inaan daabbaco sanad kadibna buug kale ayaan qoray waanan ku guuldarraystay dhameeystirdiisa meel dhexe ayaan ku joojiyay laakiin markasta oo aan ku fashilmo inaan gaadho hadafkayga maanan quusanaynin niyadana iskama aanan dilaynin ee waxaan naftayda hoos ugu sheegi jiray "maalin uun ayay riyadaydu u rumoobi hadii ay  samirka kaashato" guulddaro kastana wax ayaan ka baran jiray. waxaanan ogaaday in isku daygu kuu sahlo guuldarrada, guuldarraduna kuu sahasho ama kugu rido wadada guusha.waxaan kaloo aan xasuustaa markasta aan guuldarraysto waxaa idhiirigalin jiray saaxiibkay wuxuuna igu dhihi jiray xikmada qaaliga " yaxye noloshu waa sida shimbira laayaha oo kale waxaa dhacda inay noloshu marmar dib kuu celiso markaa waxba ha layaabin waayo shimbir laayahaba si aad meel fog wax ugu toogatid waa in aad xoog dib ugu jiidid markaa taada lamida. markay noloshu dib kuu cadaadiso ogow inay meel aad u saraysa kugu tuuri doonta. ee ha is dhiibin dhaleceenta dadkana yaysan ku saamaynin." Tallada saaxiibkay ayaan qaatay oo maan is dhiibi jirin illaa aan ka rumeeyay riyadaydii ahayd inaan maalin arko buug aan qoray. Hal ku dhigeeygu wuxuu ahaa:

Wixii aad u roorteed

Raadisaa in badan iyo

Riyaddii aad leedahay

Mar uun bay rumowdaa

Rajadaadu waa guul

## ASBAABAHA KU DIIDAN IN AAD GUUL GAADHO

Dib maxaa idiin cellinay oo

Hore idiin diday

Mar uun maad ku dayataan

Khalqiga liibaanta doonayo.

Xaaji aadan axmed (afqalooc)

### 1. CABSIDA

*'Waxa ugu weyn ee hortaagan guusha waa cabsida guuldarrada.'*

*_Sven goran Eriksson*

Cabsidu waa dareen ka dhasha fikir taban badanaa, kaas oo u diida qofku inuu waxqabsado guulna ka gaadho hadaf uu leeyahay. Erayga cabsi englisha ka waxaa lagu yiraahda FEAR. Fear waxaa ay u tagan tahay xaraf xaraf ahaan.

**F** = false BEEN

**E** = evidence CADDEYN

**A** = appearing U MUUQATA

**R** = real XAQIIQ (RUN)

Hadaba cabsidu waa cadeyn been ah oo u muuqato run ama waa fikir taban.waa mala awaal kaasi oo kuu diida inaad guul aad gaadho,

Si guud fikirku kugu soo dhacayo markaad doonaysid in aad waxqabsato waa laba nooc oo kala ah:

1) Fikir taban
2) Fikir togan

Tusaale, hadaad rabto in aad ganacsade noqotid waxaa maskaxdaada ku soo dhici laba fikir ka koowaad waa fikirka taban oo isagu ku dhihi waad khasaari, waad guuldarraysani iyo adigu ganacsiga ku ma fiicnid iwm fikirkani waxaa uu dhaliyaa cabsida in aad mustaqbalka ka cabsatid. hadaad fikirka taban maskaxdaada aad ku borogramiso waxaa ay gali caqliga gudaha caqligaas oo ka dhigo isagu wixii lagu celceliyo caado. caadadasina waxay kaa horjoogsani inaad guul gaadho. Waxaad na ku qanci in aadan wax qabsan Karin. Fikirka kalana waa fikir togan kaas oo isagu ku dhihi waad guulaysani faa`iidana waad kaheli iwm. fikirkanaa hadaad raacdid waad ka mira dhalini waxaad rabto. hadaba had iyo jeer noqo mid leh aragti togan haddii aad rabto inaad guul gaadho ha ka cabsan guuldarada. dadka ka cabsada in ay guuldarreystaan marnaba ma dhandhamiyaan farxadda guusha.

*"Haddii aad rabto inaan guul gaadho, ahdaaftaadana aad xaqiijiso, ha cabsan, balse waajah cabsida. Sida kaliya eed cabsida aad ku baabin kartaa, wa inaad marka hore iyada aad waajahdo. La saaxiib dadka kalsoonida badan, waxaad arki shay aad ka cabsatay oo ay iyagu horre u sameeyen, ka dib adigunae same say sameyeen. Mar walbana ogsoonow in cabsidu ay tahay fursadda geesiga lagu noqdo."*

*_Bill Fitzaptrick.*

## 2. CUDURDAARKA

*'Cudurdaarradu waa musmaarrada loo isticmaalo in lagu dhiso aqalka guuldarrada.'*

*_Bill rechine*

Boqolkiiba sagaashan iyo sagaal guuldarrooyin ku waxay ka yimaadiin dadka leh caadada ah in wax walba cudurdaar loo sameeya ama ku tiirsan hal shay oo kaliyaata.

**Sheeho xikmad leh: sacaaga dil!**

Waxaa jiray nin xigmad badan oo dadku talo iyo tacliin u raadsadaan. Wiil dhalin yaro ah ayaa u yimi oo wuxuu waydiistay xigmad waxtar u leh si uu wax uqabsado aduun iyo aakhiraba. Xigmad Badane wuxuu ka hubiyey wiilka in rabitaankiisa xigmaddu tahay mid ka dhab ah, markaas ka dib ayuu wuxuu la galay socdaal kuna yiri "Anaa ku tusaya waxa xigmaddu tahay." Maalin lasocoy oo maalin kale lasocoy oo tuulooyin badan lamar. Kadib markii muddo la soconayey ayaa ninkii xigamadda badnaa wiilkii wuxuu u sheegay in uu raadinayo reerka ugu saboolsan tuulada ay Marayaan. Muddo kadib ayey arkeen guri dhoqosha ah oo aan mundulna ahayn cariishna ahayn oo aad ubaaba'san. Waxaa guriga bannankiisa ku xiran sac reerku leeyahay. Reerku waxay ka koob naayeen sideed qof siddeedaa qof waxay dhamaantood ka shaqaynayeen sacaas Mid lisa, mid caws u dhiga, mid daajiya, mid xerada u ooda iyo mid daryeel kiisa kale uqaabil sanba. Xigmad badane wuxuu wiilkii ku yidhi, "Caawa reerkan baan la bar yaynaa". Reerkii way soo dhaweeyeen martida u timi iyaga oo ka cududaartay inay sacaas caanihiisa ma ahee aysan wax kale hayn Wixii ay haysteen ayey la wadaageen. Xigmada badane waxa uu reerka usheegay inay guuraynayaan oo socod dheer sugayo waana nabadeeyey reerka maadaama ay jar maadayaan. Intaan qofna kicin ayuu kacay

xigmad badane wuxuuna ku leexday xeradii mar kaas ayuu bilaawe ama mindi la soo baxay oo sacii gow racay. Wiilkii ayaa qayliyey oo yidhi “ saca kaliya ayaa reerku leeyahay ee sidee uga dili kartaa?” Xigmad badane dhag jalaq uma siin ee hawshiisa ayuu watay markaas ayey shanqar la’aan socod koodii wateen. Hal sano ka dib ayaa xigmad badane wiil kii wuxuu ku yidhi ina keen waan soconay naaye.Waxay yimaadeen tuuladii uu saca reerka kaga dilay marka ay meeshii yimaadeen ayaa wiilkii garan waayey gurgii in kastoo meeshu tahay goobtii uu ku ogaa gurigii doqoshka ahaa.Waxaa badalay guri cusub oo daar ah waxaana ku kor yaal beer aad u weyn oo dadka jooga ay mashquulyihiin qof walibana hawl gacanta kula jiro. Gurigii ayey yimaadeen oo reerkii salaameen. Waa la isgartay oo la is waraystay. Reerkii waxay u sheegeen in subixii aad naga tagteen mid habaar qaba uu sacii ka dilay. In ay maalmo barooranayeen dariskuna usoo gurmaday. Tacsi ka dib waxay garowsadeen inay ka faaiidaysteen is badalka kuyimi naftooda oo wax hor leh qabsadaan. Waxay go’aan sadeen inay beer tabcadaan, maadaama ay qoys balaaran yihiin abuurkiisana way dayn qaateen xilligii ugu horaysay markii beertu usoo go day ayey dayntiina iska baxsheen wixii u soo harayna gurigan dhagaxaa ku dhisteen. Waxayna qorshaysanayaan in midho badan usoo go’aan.Waxayna yiraah deen in kastoo markii hore aad ugu barooranay hadana waxaan ogaanay waxa hormarka noo diidan inuu ahaa saca. Markaas xigamad badane wiilkii wuxuu ku yiri “xigmadda noloasha lagu hormariyo waa adiga oo sacaaga dila. Qof waliba waxuu leeyahay sac ama darbi uu jabin karo oo ka hor jooga in uu hadafkiisa gaaro. Taas oo qofku markuu fakaro kadib soo baxda oo khatar badan tusta sidaas darteed qofka fulaygaa cabsi galisa ka dibna fakarkiisa burburisa oo hormarka u diida Hadaba raadi saca hormarka kaa hor taagan kadib na gawrac si aad hormarka aad tiigsanayso ugaarto”

Cudurdaarda dadku ku cudurdaartaan waxaa ka mid ah

- Cudurdaar xaalad cafimaad
- Cudurdaar xaalad lacag la`aan ah
- Cudurdaar xaalad da` iyo wixii la mid ah

**Cudurdaar xaalad caafimaad**

Waa adigoo ku cudurdaarta in aad jidh ahaan caafimaad kaagu dhanayn ama aadan lixdaadi lixaad adan lahayn sida inaa tahay curyaan, dhagoole, indhoole iwm. laakiin waxaas oo dhan cudurdaar kuu ma noqonayaa kaamana hor istaagi karaan inaad noloshaada horumariso oo aad ka mira dhaliso riyooyinkaaga mustaqbaleed qof heer sarana noqotid. waxaad ogsoonaataana in aad tahay qof wax badali kara xaalad kasto oo aad ku sugantahayna aad guulka gaadhi kartid waxaad adigu rabto, adiga uun ayay kugu xidhantahay in aad horumar gaadhid.

**DR.ZAKI CISMAAN**

Dr.Zaki cismaan waxaa uu ahaa indhoole, curyaana ahaa laakiin ma saameynin cudurdaar xaalad caafimaad ah waxaana uu ku riyoonjiray inuu noqdo shaqsi muhiim ah waliba ah khadiib, imaam iyo daaci hadaba si uu uga mira dhaliyo riyooyinkiisa waa inuu waxbarto waxaa uuna bartay quraanka kariimka wuuna xifiday. waxaa uu ku guulaystay inuu helo laba shahaado bachelor ah, master iyo PHD waxaa uu noqday waxaa uu ku riyoonjiray oo ahaa imaam, daaci waxaa kaloo uu noqday macalin jaamacadeed. Waxaa uu qoray afar iyo labaatan kitaab oo uu ka qoray dacwada, tafsiirka, ilbaxnimada iyo cilmiga bulshada. Indhoolihii curyaanka ahaa waxaa uu awooday inuu guulaysto riyooyinkiisa.

**HELLEN KELLER**

Hellen waxaay ku dhalatay indha la`aan iyo dhaga la`aan waxaay go`aansatay in ay jaamacad dhigato go`aankeedina way fulisay waxay gashay jaamacad weyna ka qalin jabisay. waxayna noqotay macalimad jaamacadaha dhigto, qoraa, waxay

aliftay buugaag badan, siyaasada wadankeedana door muhiim ah ayay ka qaadatay. Hellen iyadoo dhaga la` indhoolana ah isma ay san dhibin ama ma cudurdaaran ee waxaay ka mira dhalisay hankeedii.

**NICK FOACK**

Nick foack waxaa uu ku dhashay luga la`aan iyo gacma la`aan laakiin waa dhiirigaliye iyo guubaabiye caalamiya waxaa uun ka qudbadeeyo jaamacdaha iyo dugsiyada sare.Waxaa uuna yidhi

*‘waxaa ah wax laga xumaado in aad aaminto in lagaa fiican yahay, waxaa kaloo ah wax lala yaabo inaad rumaysato in aadan waxba ahayn.’*

**Cudurdaar xaalad lacagla`aan ah**

Hadaad tiraahdo wax ma qabsan karo maxaayeelay ma heesto furiihii waxkasto furayay (lacag) waad khaldantahay. ilaahay wayne waxaa uu ku siiyay maskax aad waxaad rabto aad ku samaysan karto ee ka faaiidayso caqligaaga .

*‘Jeeb madhani waligii muu hor istaagin inuu qofku gaadho horumar balse maskexda madhan iyadaa hawshaa qabata.’*

*_DR.ibrahim alfiky*

*‘Ma tihid sabool hadii aad tahay bilaa lacag waxa aad sabool tahay hadii aad tahay bilaa riyo.’*

*_Randy goge*

## 3. QUUSASHADA

Quusashadu waa rajo beelid ama waa in aad faraha ka qaado waxaad rabtay in aad guul ka gaadhid adigoo u aanaynayo in aad marar badan aad ku fashilantay. waana dabar adag oo qofka uga xiran maskaxda kaas oo u diidayo in uu dhaqdhaqaaq xor ah sameeyo in uu fekero, kadibna dhaxalsiisa in uu aamino in uusan ahayn wax jiro. Sababta koowaad ee qofku u guulaystaa waa isaga oo aan marnaba quusan kuwo guulaysato waa kuwa waligood aan quusanin.

**Sheeko xikmad leh:marna ba ha quusan!**

Waxaa jiray nin beeraley ah oo beer weyn lahaa. ninkaas beertiisa dhowr jeer ayuu ku qasaaray markii danbe wuxuu go`aansaday in uu geed weyn oo beertiisa ku ag yiil inta hoos fariisto uu ka fakaro wixii uu beertiisa ka yeeli lahaa madaamaa uu dhowr jeer khasaaray. isagoo geedka hoos fadhiya oo ka fekeraya halkii uu ku dhaqaajin lahaa ayuu wuxuu isha la raacay quraanjo oo geedka jirida kasoo koreysa oo markay xoogaa socotaba soo dhacda. qoraanjadu ma quusato oo mar waliba ay soo dhacdo wey ku celisaa koritaanka geedka. aakhirkii quraanjadii waxaa u suurto gashay in ay geedkii dusha ugu baxdo oo gaarto halkeey rabto. ninkii halkaas wuxuu ka qaatay cashar oo wuxuu ogaaday wax walboo loo sabro in la gaari karo. sidaas ayuu beertiisi dib ugu noqday ilaa uu aakhirkii ka gaaro guusha waxaana uu noqday maalqabeen wayn.

*“Qaar badan oo guuldarraystay waa kuwa aan ogsoonayn sida ay ug dhawaayeen guusha marka ay faraha ka qaadeen.”*

*_Thomas Edison*

Mar walba oo ay waddo kaa soo xidhanto macnaheedu maaha innaanay waddo kale furnayn, dabcan way kuu furan tahay, waxay se kaaga baahan tahay baadhid

iyo baadigoobid. Noqo biyo oo kale, biyuhu iyagoo socda haday dhagax ku soo beegmaan, dhinac ayay ka maran, hadii ay dhinacyadu ka xidhmaan na, dhagaxa dushiisay maran, hadii ay meel wal ba kasoo xidhantana, dhagaxa hoostiisay ka dusaan, ka ogow naftaada quus, waayo quustu waa albaabada isku dayga soo xidh xidha.

*“Marnaba maad guuldarreysan illaa aad joojisid isku dayga.”*

*_Henry Drummond*

4. **DIB U DHIGISTA IYO WAHSIGA**

Waa adigoo qorsha aad maanta qaban lahayd barri u dhigatid naftaadana aad ku maawayliso yididiilo been ah. Dib u dhigistu waa mid ka mid ah asbaababaha waawayn ee kuu diidan inaad horumar gaadho.

*‘Marna dib ha u dhigin barri wax aad manta awooddo in aad qabatid.’*

*_ Benjamin franklin*

Si guud tala daydu waa in marna bari la samayn wax aad maanta sameyn kartid dib u dhigistuna waa tuuga wakhtiga. mustaq balkaaguna waxaa uu ku xiranyahay waxaad maantay sameeyso.

5. **GUULDARROYINKII HORE**

Saynisyahano ku takhasuusay cilmiga bada xili ay samenayeen cilmi baaris ayay Libaax baddeed  ku dhex rideen taangi muraayad ah oo biyo ku jiraan kadibna wax kalooy ku dhex rideen taangigii kalluumo yar yar **(shoox)** oo aad u faro badan isla markiiba libaax baddeedkii intuu dabaashay ayuu weeraray kalluumadii yar yaraa gabina wuu wada cunay. saynisyanadii waxay dhexdhigeen taangigii  muraayad adag, taangigina waxay ka dhigeen laba qaybood qayb libaax baddeedkii ayay ku

rideen qaybtii kalena kalluumo yar yar (shoox) oo cusub ayay ku rideen. libaax badeedkii kalluumadii yaryaraa ayuu weeraray laakiin muraayadii ay ku dhex rideen taangiga ayaa ka soo celisay dhawr jeer  ayuu weeraray, mar kasta oo uu weerarana muraayada ayaa madaxa kaga dhaceysay saacad kadibna wuu is dhiibay weerarkina wuu joojiyay. wuxuuna muraayada ka dhex arkaayay kalluumadii yar yar oo si xor ah u dabaalanayo. tijaabadan mudo saddex todobaad ayeey ku celceliyeen libaax baddeedkiina wuu laqabsaday in ay muraayad u dhaxeeyso wuxuuna joojiyay weeraradii. saynisyaanadii waxay ka dhexsaareen muraayadii labada qaybood u dhexeysay laakiin libaax baddeedkii muu san weerarin kalluumadii yar yaraa maxaa yeelay waxaa lagu tababaray in uu u dhexeeyo isaga iyo kalluumada muraayad. kalluumadiina si hor ah ayey ugu noolaayeen taangiga.

**Dulucda cilmi baarista**

Badi dadku waxaa ay is dhiibaan marka guuldarrooyin fara badan la kulmaan sidii libaax baddeedkii  waxa ay aaminan ama ay rumeeystaan ineey guulaysan Karin madaamooy guuldarrooyin farabadan la kulmeen. waxaana maskaxdooda ku xirma dabar adag oo u diida ina ay  guul gaadhaan. hadaad  rabtid inaad noloshaada guul ka gaadho iska illaali dabarada guuldarrooyinka ka dhasho.

## 6. AQOON DARRADA

Aqoon darradu waa shayga ugu horeya ee kuu diidan inaad nolosha guul la taaban karo aad ka gaadhid waxna aad ka badashid noloshaada si aad dadka dhexdiisa magac iyo maamuus aad ugu dhaxyeelato. Hadii aadan aqoon aadan lahayn ma gaari kartid hadafkaaga iyo qorshe aad dajisatay. aqoontu waa furaha horumarka waana sheyga lagu kalo garto waxa naftaada horumarinayo oo aad guul ku gaadhaysid iyo guuldarrada .

**Sheeko xikmad leh: Beerole Iyo Dhagaxaan**

Waqti waqtiyada ka mid ah ayaa nin beeralay ah oo ku nool wadanka Bangaladesh doonay inuu beertiisa qoto waqtigii gu'ga, isla markii uu bilaabay shaqadii qodaalka ee uu qalabkii iyo cagaftiiba galiyay ayaa meel beerta badhtankeeda ah ayay cagaftii ku istaagtay oo ay qodi kari wayday, ninkii oo yaaban ayaa ka soo daadagay cagaftii deetana eegay waxa joojiyay, waxba laakiin indhihiisu may qaban, ka dib wuxuu ula tagay gacantiisa oo uu ku qoday, waxooga markii uu qoday ayaa waxa kaga soo baxay sanduuq! farxad ayuu kala wareegay oo isla markiiba si dag dag ah ayuu u furay, mise waaba dhagaxaan madmadow oo ka buuxa, isaga oo niyad jabsan ayuu iska xidhay sanduuqii oo uu dhinac iskaga leexiyay. Naftiisa ayuu ugu sheekeyey "kolay anfac kale ma lehee shimbiraha ayaad kaga ceshan beertu markay kuu baxdo." hawshiisii ayuu dib u bilaabay oo uu dhamaystay. In muddo ah markay ka soo wareegtay ee ay beertiina baxday midhihiina bislaadeen ayay shimbirihii u soo diyaar garoobeen inay cunaan, ninkiina difaac ayuu galay oo dhagaxaantii uu sanduuqa ku ogaa ayuu la soo baxay oo uu ku kala caydhin jiray maalin walba. Isaga oo xaaladii ku jira oo maalinba dhagaxaanta badh ka mid ah ku shiida oo ku caydhiya shimbiraha ayaa uu nin soo maray waddo beerta dhinaceeda marta, waxa si kadis ah hortiisa ugu soo dhacay laba dhagax oo madmadow, intuu istaagay ayuu kor u qaaday oo uu eegay, mise waaba Dahab! Ninkani waxa uu ahaa nin dahable ah oo ka ganacsada dhagaxaanta macdanta ah sida Dahabka, Daimond-ka iyo IWM. Ninkii wuxuu gartay in labadan dhagax ay yihiin dahab waxaanu ku leexday beertii ninkii beeroolaha ahaa ee uu dhinac marayay, wuxuu salaamay ninkii, salaan ka dib wuxuu ku yidhi "dhagaxaantan ma adigaa soo tuuray" wuxuu ugu jawaabay " haa, oo waxaan ku caydhinayay shimbiro weerar ku haya beertayda."intuu dhoola cadeeyey ayuu ku yidhi "xabadiiba iga sii lacag dhan $5000." Intuu qoslay ninkii beerlayda ahaa

ayuu si kaftan ah u yidhi “Maya” isaga oo moodaya inuu ninkani la kaftamayo. Ninkiiba jeebada ka soo saaray $100,000 oo midiiba kaga iibsaday $50,000 wuxuuna u sheegay inay labadan dhagax yihiin Dahab, isla markii uu intaas u sheegay ayuu oohin qabsaday oo uu yidhi “Sanduuq dhan ayaan haystay laakiin waxaan ku kala filqay afarta jiho aniga oo shimbiro ku caydhinaya labadan oo kaliya ayaa ka soo hadhay.” Haddii uu maanta sanduuqii buuxay haysan lahaa intee in leeg oo lacag ah ayuu heli lahaa?

## 7. KA FIKIRIDA WIXII TAGAY

Marka wax dhaceen wey dhaceen dib ha u eegin, hore uga soco hadafkaaga ka xiga hana ku mashquulin waxii tagay maxaayeelay waxaa aay kugu dhalinaysaa in aad ka cabsatid mustaqbalka kugu soo fooda leh.cabsidaasna waxaay kuu horseedaysaa fashilka ama guuldarada.

**Sheeko xikmad leh: direewal**

waxaa jiray oday aad u jaclaa inuu noqdo direewal. odaygii ma uusan galin dugsiyada lagu barto direewalnimada si uu u barto direewalnimada laakiin isga ayaa iska bartay wadida gaadhiga laba cisho ka dib intuu bartay inuu wado gaadhiga. odaygii waxaa uu go`aansaday in uu safro magaaladii ku xigtay oo u jirtay 30 km markiiba gaadhii ayuu dhaqaajiyay ilaa iyo magaalada uu doonayaay in uu tago markuu kala bartanka socdo ayuu maqlay hoon xaga dan be ka yeerayo. Waxaa uu fiiriyaay muraayad haadki waxaa uu arkay baabuur badan oo ka danbeeyso odaygii waxaa uu ku mashquulay in uu eego muraayad haadka mudo dhan isagoo ka cabsi qaba in baabuurtu xaga danbe ka dhacaan. waxaa uuna ilaaway in uu fiiriyo muraayada hore nasiib daro odaygii gadhigiisi waxaa uu ka baxay haadkii oo wuu rogmaday odaygiina halkii ayuu ku naf baxay.

## 8. SAAXIIBKA XUN

Saaxiibka xun waa cadawga koowaad ee kuu diiddan inaad horumar gaadhid waxaana uu kugu saameeyaa si dhib yar dhaqamada xun xun uu leeyahay sida cabida sigaarka, khamriga, cunida jaadka, cunida doroogada iyo wax kasto oo naftaada mustaqbalkeeda u keenayo dhibaato. saaxiibka xun waa sidda cuf is jiidadka dhulka oo kale. bal ufiirso tusaale han hadaad qalin kor u tuurtid waxaa dhulka ku soo celinaayo oo u diidan inuu kor aado waa cuf isjiidadka dhulka sidaas oo kale saaxiibada xuni wax aay kuu diidayaan inaad gaadhid halkaad hiigsanaysid waxayna kaa dhigayaan fadhiid aan kor u kicikarin. Hadaad rabto in aad guul gaadho wax aad rabtana ka mira dhaliso waa in aad ka fogaataa saaxiibada xun xun ama iska dayso saaxiibtinimadooda. Lana saaxiib dadka wanaagsan ku waas oo leh rajo wanaagsan.

*"shimbir shimbirkiisuu la duulaa."*

*_murti soomaaliyeed*

Helida saaxiib wanaagsan waa mid ka mid ah guulaha lagu gaadho halganka nolosha ku dadaal helida saaxiib wanaagsan. Hana la saaxiibin qof xun. Si uun noloshaada halis u galin !

**Sheeko xikmad leh: Saaxiibtinimo**

Bari baa waxaa jiri jiray labo wiil oo saaxiibo ah, oo la kala yidhaahdo cali iyo xasan maalin maalmaha ka mid ah waxay tageen duurka ballantoodu waxay ahayd inayna kala cararin hadii uu midkood arko bahal. xoogaa markay socdeen ayaa wuxu xasan arkay shabeel. markaasuu intuu cararay ayuu geed dushii koray. cali markii uu shabeelkii arkay ayuu intuu dhulka seexday, iska dhigay qof mayd ah shabeelkii intuu cali uriyay ayuu iskaga tagay. xasan markuu arkay inuu shabeelkii

tagay ayuu u yimid cali, markaa suu ku yidhi, “saaxiibow, in uu shabeelku dhegta wax kuugu sheegaayay ayaan arkee, muxuu kuugu sheegay?” Cali intuu dhulka ka soo is taagay ayuu ugu jawaabay, “wuxuu igu yidhi, saaxiibadaada duurka kaaga caraaraya ha la saaxiibin. saaxiibtinimadaadan ma doonaayo ee iga fogaaw.”

## 9. BALWADA

*“Waxaad barato waa baaskaa.”*

*_Murti soomaaliyeed*

balwadu waa wax naftu la qabsatay oo ay mudo ku celceliso sida magaca ku cad waa BAL_WAD waana waaxaad muddo wadid. balwadu waa laba nooc

- ✓ balwad fiican sida isboortiga, wax akhrista iwm
- ✓ balwad xun sida cabida sigaarka, qaadka iwm.

Balwada xun waa mid ka mid ah asbaabaha waa weyn ee kuu diidan inaad noloshaada isbadal lataaban karo ka gaadho.balwada xun waa shay si dhibyar lagu bilaabo laakiin ay adagtahay in la iska deeyo. Hadaba si aad hiigsigaaga iyo himiladaada u gaadho iskaga fogaaw balwad xun sameysana balwad fiican taas oo horumar aad ku gaadhaysid.

**Faa`iido darada balwada xun**

- ➢ Naftaada ayay waxyeelaysa xaga caafimaadka
- ➢ Wakhtiga ayaad ku luminaysaa
- ➢ Dhaqaalahaaga ayaa hoos u dhigaysa
- ➢ Hadafkaaga ayay caqabad ku noqonaysaa.
- ➢ Waxay kaa dhigaysaa mid gabo kaalintiisi bulsho.

Dooriga tubaakadu adeer waa wax kuu darane

Dabkan aad cuntiyo qaacu wow daaanno feeraha e’

Sidii daamur buu kaaga dhegin daabka xuunshade e’

Dibnaha iyo afkaa waxay ku noqon dagal haruushada e’

Daqayada ma naaxaan nin cunay shay darooga lehe

Abbateydka iyo wuxuu kaa dilaa gaajo diidaha e

Waxay duubiyadu kuu ekaan diriq sidiisiye

Diif iyo xanuun baad u tahay dagaanti maandhow e`

Abwaan cabdirisaaq xirsi suldaan

**10.RAALIGALINTA QOF KASTA**

*‘Ma aqaan furaha guusha, laakiin furaha guuldaradu waa isku dayga in qof waliba la raaligaliyo.’*

*_Bill cosby*

***Sheeko xikmad leh: abbo, wiil iyo dameer***

Bari waxaa is raacay aabo iyo wiil uu dhalay waxayna wada fuuleen dameer si ay suuqa ugu tagaaan horay Markaay muddo wada fuushanaayeen ayaa waxaa ka soo hor baxay niman. nimankii ayaa ku dhaga hadlay oo ku yiri “ waa maxay labadan doqon ee dameerka miskiinka ah laba kuwada fuushan” odaygii ayaa isla markiiba ka dagay dameerka oo hogaanka u qabtay si uu wiilkiisa ugu wado markuu cabaar ku waday ayaa waxaa ka soo horbaxay gabdho. gabdhihiina waxeey ku yiraahdeen “bal eega wiilkan doqonka ee aabihii ka wayn lugaysinayo isaguna dameerka fuushan.” Intaas ka dib wiilkii ayaa ka soo dagay dameerka odaygii ayaa koray

dameerkii. markaay muddo socdeen waxaa la kulmay dhalinyar dhalinyarradiina waxaay ku yiraahdeen “waligeen maanan arag odaygan oo kale wiilkiisa yar lugeeysiinayo isaguna dameerka fuushanyahay.” Odaygii ayaa ka soo dagay dameerkii wiilkiisana u sheegay in labadooduba ayna wada korin. dameerkuna kaligis u socdo markay muddo saddexdooduba isgarab socdeen ayaa waxaa ka soo horbaxay odayaal. odayaashii ayaa hadana ku dhago hadlay oo ku yiri “waa maxay dadkan aan garanaynin sida dameerka loo isticmaalo.” Markii ay suuqi soo gaaraan oo ay fadhiisteen ayuu wiilkii yaraa aabihii waydiiyay “aabo maxay dadku wax in ooga sheegayeen?” odaygii ayaa ugu jawaabay “wiilkaaygi aan jeclayoow waxaan ku barayay cashirka nolosha ugu mihiimsan kaasi oo ah hadii aad istiraahdo dadka wada qanci ama raaligali aadan raligalin Karin.

*‘afkaarta khaldan ee dadku ku sheegan ayaa ka hortaagan guusha.’*

*_Yaxye yaasiin xasan*

## 11.ADKAYSI LA’AANTA

Waan kari waayay, wakhtigaa dheeraaday iyo way adkaatay waa erayada ugu badan ee aad ka maqli dad ku guuldarraysta howl ay hayeen dadkani waa kuwa aan laheen adkaysi iyo dulqaad waxayna is dhiibaan guusha markay ugu harsantahay talaabo kaliya mana ku sabraan dhibaatooyinka soo wajahayo .

**Sheeko xikmad leh: adkaysi la’aanta**

Maalin ayuu Eygu u tegay Libaax oo ah boqorka Xayawaanka, waxaana uu ku yidhi Boqor waxaan doonayaa inaad iga bedesho magaca Ey maxaa yeelay wuu xun yahay. Libaaxii ayaa ku yidhi “Maxaad ku ogaatay ?’ Eyga ayaa yidhi “ Dadka ayaaba isku caaya, oo ka xun ku yidhaa Ey” Libaaxii ayaa ku yidhi adigu khaayin ayaad tahay magacan ayuun baa kuu qalma. Eygii ayaa ku yidhi horta maad

itijaabisid! Ka dibna Libaaxii ayaa u dhiibay waslad hilib ah, oo uu ku yidhi ii hay ilaa berii subaxa. Eygii ayaa habeenkii gaajooday oo kolba dhinac ka eega wasladii hilibka ahayd. Markii waaggi baryay ayuu yidhi magacayga Ey, ma mid ka wanaagsan ayaa jira, maxaan gaajo iskaga eegi ? Maya. Ka dibna wuu cunay.

**Dulucda sheekada**

Dulucda sheekadu waxaa weeye adkaysi la'aantu in eey kuu horseedayso guuldarrada sidii eygan haleeshay. hadii eygu dulqaadan lahaa ama adkaysan lahaa uunsan cuneen wasladii hilibka ujeedada uu rabay wuu gaadhi lahaa magacana waa laga badali lahaa. Dadka badi waxaay is dhiibaan marka ay u dhawyihiin in eey guusha hantiyaan .

## 12.HURDADA BADAN

Hurdada nin badsaday bulshada ma hago

horay u socod iyo hal hays ma noqdo

hubaal ma hirdiyo halkii la raboo

horumarka wuu hantaaqa

abwaan dhinbiil

**sheeko xikmad leh: nin seexdu sicii dibi dhalaa**

habeen habeenada ka mid ah ayaa laba nin ay u dhalayeen labadoodii sac ayaa intey labadii sac foolanayeen uu seexday midka mid ah labadii nin. labadii sac midna wuxuu dhalay weyl midna dibi. subaxnimadii markii la soo toosay ayuu kii soo jeeday sheegtay inuu siciisu yahay midka dhalay weysha midkii seexdayna loo dhalay dibiga markay isqabsadeen oo look ala gar qaadayna waxaa weyshii loo xukumay kii soo jeeday.

## 13.CAAJISKA

Caajisku waa awood darro ka timaada maskaxda taas oo qofka ka dhigaysa mid aad u liita oo daal ama culays dareema maskax ahaan iyo jidh ahaanba, sidoo kalena aan awoodin inuu shaqo qabto kana caga jiida. Dad badan oo ku kala nool qaarado kala duwan ayuu caajisku ka reebay qayrkood oo uu ka hor istaagay inay gaadhaan guul ama se hadaf yeeshaan Qof kasta oo uu caajisku haleelo waa mid rajo beel ku dhaco oo mar walba maskaxdiisa buuq ku furanyahay, cabsi badan iyo murugana hadhaysay. Dhallinyaradan danbe ee Soomaalidana waa dhibaatada ugu badan ee haysata qayb ka mid ah, kana hor taagan yoolkoodii iyo hadafyadii ay gaadhi lahaayeen.

# WADOOYINKA LOO MARO GUUSHA

Marka  hore waa maxay guul ?

Guushu waa himilo iyo hiigsi aad ledahay oo aad gaadho ama fulinta qorshe aad hore u dajisatay. Mar la waydiiyay Isaac alex phiri waxaay tahay guushu ayuu ku jawaabay anigu ma sheegi karo macnaha dhabta ah ee guusha laakiin waxaan ku soo koobi lahaa hab fudud oo ah:

1) Inaad gaarto barta riyadaada kuu tilmaamayso
2) Markaad hesho waxaa aad u baahantahay
3) Markaad ka talaabsato duruufaha iyo caqabadaha nolosha

Guul qof walba oo raba waxaa ku haboon in uu ku dhaqmo erayada guul waxa ay xarfihiisu u taagan yihiin oo ah

**G**: go’aan in aad leedahay


**U**: u fakartid si qoto dheer

**U**: u dulqaad badantahay

**L**: leedahay hadaf iyo qorshe

Marka doonaysoo in aad gaadho guul waxaad u bahannatahay in aad raacdo wadooyin, wadooyinkaasi waa sida salanka, kama boodikartid mid qudha si aad mida xigto u gaadhid, mid kasta waxa ay muhiim u tahay ta ka danbeysa, hadaad mid samaysid waxaa kuu fududaanaysa in aad samaysid oo ku dhaqantid ta ka danbeysa. wadooyinka guusha lagu gaadho waa

Fiiri jaantuuska :




jaan.1.1 wadooyinka loo maro guusha

wadaadaas aad ka u dheer waxay kaa rabtaa inaad marto oo aadan dhinacna ugu leexanin. Si aad u gaadho guul iyo badhaadhe nololeed gaadhida guul aad hiigsanayso waaxaa ka horeeyo guuldarooyin farabadan, caqabado iyo hadimooyin loo baahan yahay in laga gudbo waxaa oo dhan waxaad kaga gudbi kartaa guushuna kaa hanan kartaa in aad la timaado samir, dadaal, dhiirigelin iyo qorshe cad iwm

Guushu wakhti wacan bay rabtaa

Ku celcelin iyo karti bay rabtaa

Sammir iyo dul qaad bay rabtaa

Hadaf iyo qorshe bay rabtaaa

Adkeysi iyo dhabar adayg bay rabtaa

Dhiirigelin iyo dadaal bay rabtaa

Inaan laga daalin oo lagu dadaaley rabtaa.

## WADADA KOWAAD

## HAN

*‘Waligiin ha fududaysanina inaad riyootaan oo aad han wayn yeelataan in aad qof heer sare ah noqotaan aday kugu xidhan tahay.’*

*_Wilma Rudolph*

**Waa maxay han ?**

Han si kooban waa hami, qof uu hiigsado si uu horumar u gaadho. Waana shayga kugu xanbaaraya inaad istaagto oo aad ka mira dhaliso himiladaada. waa wadada koowaad guusha loo maro. waa hummaag mala awaal ah u qof u sawirto waxaa uu noqonayo mustaqbalka soo socdo ama waa riyooyin mustaqbaleed.

Hadaba adigu ma leedahay han ?

Qofkasto oo bini`aadan ah han wuu leeyahay laakiin waa lagu kala sareeyaa waxaa jira qof han yar iyo qof han wayn. Qofka hanka yari hada iyo jeer waa ka bulshada ugu liito wax guul ah na ma gaadho maxaa yeelay waxaa uu ku qanacsan yahay waxyaalo aad u yar yar mana rabo in uu isbadal la yimaado maadaamo isbadalku yahay wax dhib badan. Qof ka hanka waynina nolosha waa ku guulaystaa waxaa uu ku haminaayana waa helaa. han weynidu waxaa lagu tibaaxaa in ay tahay matoorka kiciya awoodaada iyo tamarta ku qarsoon.

*“Qof han yar ma hana qaado.”*

*_Murti soomaaliyeed*

**Sheeko xikmad leh: faraqa u dhexeeya hanka wayn iyo hanka yar**

Hada kahor waxaa la yiri laba nin oo saaxiibo ah misana isku aqoon ahaa ayaa shaqo xamaal ah kawada dalbadeen garoonka diyaaradaha kadibna labadii nin ee saaxiibada ahaa waxaa loogu yeeray bal in laga waraysto aqoonta ay u leeyihiin shaqada ay donayaan in qabtaan, mid waliba mar ayaa lala yeeshay waraysi gaar ah kadibna waxaa lagu yiri “jawaabta naga suga” Maalmo yar guduhood mid waliba waxaa loo soo diray warqad ka socoto xafiiskii ay shaqada kawada dalbadeen, hadaba labadii nin mid ka mid ah waxaa loo soo diray warqad sidan u qoran. “ Waan ka xunahay adigu ma tihid ruuxii aan raadinaynay oo shaqadaan ka soo bixi lahaa sidaa awgeed codsigaagii ma aqbali karno.” Midkii kalana waxaa loo soo diray warqad ah sidan “Hambalyo codsigaagii waa la aqbalay, waxaadna tahay ruuxii aan raadinaynay, baritoolana waad bilaabi kartaa shaqadaada, mahadsanid.” Intaa kadib labadii nin ayaa iswaraystay oo midkii codsigiisa la diiday waxa uu saaxiibkii ku yiri “ war nin yahoow waa taan isku aqoon iyo isku xirfadba ahayn ee siday ku dhacday in adna lagu qaato anigana la I qaadan waayo.” Arinku markay intaa maraysay waxay labadii nin go`aan ku qaateen bal in ay ku laabtaan xafiiskii si ay u waydiiyaan waxaa midna lagu qaatay midna lagu diiday. Ninkii waraysiga ka qaaday waxaa uu ugu jawaabay sidan. Waxaan markii horeba raadinaynay hal shaqsi oo u qalma shaqadaan sidaa awgeed markaan wareysiga idinla yeelanay waxaan ogaanay aqoonta aad shaqadaan u leedihiin iyo waaya aragnimada aad ka haysataanba in ay isku mid tahay balse anagu shahaado iyo aqoon oo kaliya dadka ku ma qiimayno waxaanse eegnaa hadba hamiga uu qofku leeyahay, sidaa darted su`aalihii la idin waydiiyay waxaa kamid ahayd su`aal ah. Waa maxay waxa aad jeceshahay in aad noqoto ? Midkiin waxa uu noogu jawaabay : “waxaan doonayaa inaan noqdo shaqaalaha ugu wanaagsan ee ka shaqeeya halkan” Sidaa awgeed ayaan u diidnay in aan shaqaalaysiino ruux

hamigiisa ugu wayn uu yahay weligii inuu shaqaale uu ahaado oo uun ka da licin. Sidoo kale islaa su`aashaan waxaan waydiinay midkiin waxaa uuna noogu jawaabay "waxaan doonayaaa in aan noqdo duuliye(baylood)" Sidaa awgeed waxaan u aragnay ninkaan inuu yahay qof han sare leh oo laga yaabo shaqadeena inuu isbedel wanaagsan ku soo kordhiyo taasi ayaana keentay in aan aqbalno codsigiisii.

Hadaba akhriste hankaaga sare u qaad si aad waxaad hiigsanaasid aad u gaarto waa gaadhi guusha ogoow hankaagu waa hormarkaaga

*Waligaa hankaagiyo*

Himiladaada dheeree

Hiigso meel saraysoo

Hadafkaaga gaar yeel

Noole hankaagoo

Rajadaada hawl gali

Waligaa habsamadiyo

Ku dadaal hubsiimada

Wax ku hiifa waad heli

Neceb horumarkaage

Inta aad hayaan tahay

Samirkaa adkee

Naftu hawl ma waydee

Ku ilaali hore usocod

Hayba waxaad ka dhigataa

Halkaad gaadh isleedahay

Hiilna waxaad ka dhigataa

Cidda aad la heer tahay

Waligaa naftaadana

Ku hogaami diintoo

Ha ilaawin islaamnimo.

Abwaan cabdiweli xasan jaamac

**Riyo mustaqbal**

*'Hadii aad ku riyoon karto waa gaadhi kartaa.'*

*_Walt disney*

Dhamaan riyooyinkeena waxay noqon karaa run hadii aynnu ku dhiiranno in aynnu raacdaysano kuna samirno sidii aan u rumayn leheen tusaale Lait Honda oo jaabaaniis ah shay kasta oo adagi waa suuragal inuu dhaco, wuxuu ahaa markuu yaraa mid ku riyooda inuu noqdo nin muhiima marka uu waynaado, imikana wuxuu leeyahay shirkada ugu wayn ee Honda wuxuuna ku riyoon jiray inuu gawaadhidiisa ku magacaabo magaciisa Honda. wakhtigaana waxaa wadanka ugu sareeyay shirkada Toyota oo guul aad u wayn gaadhay, isaguna wakhtigaas jaamacada ayuu dhigan jiray, iyadoo sidaas ah waxaa u doonanay gabadh, taas oo udiyaargaroobay inuu guursado, waxaa laga codsaday inuu sameeyo mushiin cusub, wuuna sameeyay laakiin ma noqon mid munaasiba, markale ayuu dib ugu

noqday si uu u sameeyo kii labad, dadaal badan kadib mushiinkii labaad wuxuu noqday mid munaasiba waana laga aqbalay, laakiin dawlada jabaan ayaa diiday saddex sanno oo kale ayuu daraasadii sii waday, aadna u dadaalay, illaa ay dawladii jabaan ka aqbasho, laakiinse isagu ma awoodi karayn inuu warshad isaga u gaara samaysto waayo lacag ku filan ma haysan, laakiin mudo kadib warshaddii wuu sameeyay, hadana wakhtigii dagaalkii labaad ee aduunka ayaa warshadii la duqeeyay oo way burburtay, hadana afar sano oo danbe ayuu diyaarinay sidii uu warshad kale u samayn lahaa illaa uu ku guulaysto inuu dhiso, hadana waxaa dhacay dhul gariir oo warshadii way burburtay. lait Honda isma dhiibin mana quusan, intaa kadib wuxuu sameeyay shaagaga, waxaa kale oo u sameeyay mootooyin, markii ay dadku arkeen mootoyinkii aad bay ula dhaceen, taasi oo keentay inuu dalab badan helo, wuxuu helay in ka badan 28 dalab isbuuc gudihii wuxuu daahfurkiisi ku wargaliyay shirkado badan oo jabaan ku yaala, waxayna ka dalbadeen wax fara badan, wuxuu gaadhay inuu helo abaalmarinta daahfurka ugu fiican ee jabaan bixiso, intaa kadib ayuu bilaabay inuu sameeyo gawaadhida Honda taas oo dunida ku baahday, wuuna xaqiijiyay riyadiisi habka ugu fiican oo aad riyadaada ku rumeenkartid waa in aad hurdada ka kacdidid oo aad baraarugtid kuna samirtid carqalad kasta oo ka hor imaanaysa.

Riyo kasta maalin ayay rumoowdaa waa hadii lagu dadaalo in laga mira dhaliyo bal kaalay aan kaaga sheekeeyo riyooyinkii rumoobay tooda ugu caansan taas oo ah riyadii martin luther king ee aheed **‘waxa aan leeyahay riyada ah maalin ay afartayda caruurahi ku noolaan doonaan qaran aan loo eegayn midabkooda ee loo eegayo dadnimadooda’** martin luther king waxa uu ahaa nin madoow oo la halgamay siduu u joojin lahaa cunsuriyadii dalka maraykanka ka jirrtay taas oo lagu haynjiray dadka madowga ah, xiligaa dadka madowgu maraykanka wax xaquuq ah oo la sheegi karo ku malahayn. dadnimadaba waa loo diidanaa oo loo

ma aqoonsanayn in ay la simanyihiin caddaanka asalkoodu yurub ka soo jeedo, loo ma oggolayn in ay galaan meelaha dadka cadi joogaan sida huteelada iyo maqaxiyaha, basaska iyo tareennada waxa ay ka fadhiisan jireen halka ugu dambaysa, ma ay dhigan jirin dugsiyada cadaanku dhigtaan waxayna ka shaqayn jirreen shaqooyinka hoose waxa kaloo ay daganaayeen xaafado gooni ah Xaaladu iyadoo sidaas ah ayuu martin luther king halganka qabtay waxuuna iska duway wixii dhiig daadin lahaa waxaa uu doortay inuu xaqiisa ku dhacsado mabda nabaddeed ee laga dhaxlay halgamaagi hindiga ahaa Gandhi. sidaas na waa ku rumeeyay riyadiisi ahayd in cansuriyada maraykanka laga tirtiro. waa uuna ku guulaystay in maraykanka cunsiriyadaas laga tirtiro. maantana waxaa maraykanka madaxwayne ka ah barrack obama oo ah nin madoow ah waana ninka rumeeyay riyadii king.

**IKHTIRAAC**

Dadka wax soo saaray waxay la hayeen riyooyin aad u fog oo ay ku hamiyi jireen iyo fikiro in ay wax ku soo kor dhiyaan aduunka hadaba si ay caalamka wax ugu soo kor dhiyaan, waa ay u daadaalen habeen iyo maalinba, u adkaysteen caqabadaha ka hor imaanayay iyo guuldarrooyinki ilaa ay ku guulaysteen. afkaartoodii Guulahaa iyo wax soosaarka cusub ee manta la gaadhay waa riyadii shalay. riyadaas oo ka dhaxguuxaysay maskax mid kamid daahfurayaash. Steve Jobs oo ahaa ninkii ikhtiraacay ama daahfuray Ipad, Itouch, Itunes, Iphone, dad waynaha aduunkuna ugu yeedhaan inuu yahay Thomas Edison-kii qarniga mar wax laga waydiiyay waxsoosarka ayuu wuxuu ku tiraabay hadalkan Cajiibka ah "Markaad soo koraysid, waxaa laguu sheegi doonaa dunidu waa Sidan ay Hadda tahay dawrkaagu waa in aad sida ay tahay uun ugu Noolaato. laakiin, Noloshaasi waa mid aad u kooban; Noloshu intaa way ka balaadhan kartaa, hadii aad ogaato hal xaqiiqo oo aad u sahlan: 'In shay kasta oo kuu dhow iyo waxkasta oo kugu

xeeran oo marka la isu geeyo aad ugu yeedho Noloshaadii ay sameeyeen dad aan kaa Caqli badnaynan; Aadna Bedeli kartid, Saameyn kartid, amaba aad dhisi kartid fekero iyo waxyaalo aad adigu iska Leedahay oo dadka kale isticmaali karaan! markaas ayaad burburinaysaa gidaarka miridhka badan ee Aduunka sidaa aad ugu timi uun ugu Noolow waxaana ku soo geleysa neecawda: Nolosha si diiran u soo dhowee, wax ka bedel, wax ku biiri, horumari, Saameyntaadana ku xaradh dunida! Marka aad intan danbe barato sidaadii hore weligaa ma noqonaysid; waxaad tahay qof cusub" Waxaa kaloo uu yidhi  waxsoosarku ma aha inaad wax cusub uun aad ikhtiraacdid ee waxaa weeyaan inaad wax uun ka badashid wixii hore ee jiray ama aad qurxisid wixii hore. mobilku wuu jiray laakiin anagu wax uun ayaan ka badalnay oo waxaan ka dhignay Ipad.

**Sheeko xikmad leh: Sidee rabtaa in laguu xusuusto markaad dhimato?**

Boqol sano ka hor, nin ayaa subax eegay Joornaalka, amakaag & naxdin, magaciisa ayuu ka aqriyay qeybta tacsida. Joornaalka ayaa si qaldan magaciisa loo ugu qoray qof kale oo dhintay. Wuxuu is weydiiyay ma halkanaan joogaa mise halkaa? Goortuu miyirkiisi helay, wuxuu is yiri bal ogow waxay dadku ka yiraahdaan beenta laga faafiyay dhimashadaada meesha lagu qoray. Ma ooyayaan mise waa dabaaldagayaan? Joornaalada waxaa ku qornaa: “Boqorki waxyaabaha qarxa oo dhintay”. “Wuxuu ahaa ganacsadihi geerida” iyo waxyaabo kale oo ka sii xun. Ninkani wuxuu ahaa ninki hindisay dynamite (Qaraxdo awood badan, oo wax lagu qarxiyo). Markuu aqriyay “ganacsadihi geerida ayaa dhintay” wuxuu naftiisa weydiiyay ma sidan ayaa la ii xusuusan doonaa markaan dhinto? Dib ayuu isagu noqday wuxuuna go’aansaday inuusan rabin in sidan loo xusuusto. Maalintaa ka dib wuxuu bilaabay inuu nabada ka shaqeeyo. Ninkaa Magaciisu waa Alfred Nobel, waxaana maanta lagu xusuustaa Bilada Nobel Peace Prize.

| TIRO | MAGAC | TAARIIKHADA | JINSIYADA | IKHTIRAAC |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Oriville and Wilbur Wright | 1871-1948 | American | Diyaarada |
| 2 | Thomas Alva Edison | 1847-1931 | American | Leydhka |
| 3 | Charles Babbage | 1791-1871 | English | Koombiitarka |
| 4 | Alexander Graham Bell | 1847-1922 | | Teleefonka |
| 5 | Abraham Louis Breguet | 1747-1823 | Switzerland | Saacada |
| 6 | John Logie Baird | 1888-1946 | Scottish | Tifiiga |
| 7 | James Harrison | 1816-1893 | Australian | Talaajada |
| 8 | Guglielmo Marconi | 1874-1937 | Italian | Radiyooga |
| 9 | Edward Butler | 1862-1940 | English | Dugdugleeyda |
| 10 | David Bughes | 1831-1900 | British | Mikirafoonka |
| 11 | Richardh Gatling | 1818-1903 | American | Qoriga, xabada |
| 12 | Henry W Seely | 1854-1908 | | Kaawiyad ledhka |
| 13 | Kirkpatrick Macmillan | 1812-1878 | Scotish | Baaskiileedka |
| 14 | E.G.Otis | 1811-1861 | | Wishka fooqaqa |
| 15 | Lee De forest | 1873-1961 | American | Filimada |
| 16 | Hery Fox Talbot | 1800-1877 | British | Sawirada |
| 17 | John Froelich | 1849-1933 | American | Cagafta beeraha |
| 18 | Barthelemy Thimonnier | 1793-1857 | French | Xarqaanka |
| 19 | Hans Lippershey | 1570-1619 | German | Teleskoopka |

Jaan.1.2 dadka caalamka wax ku soo kor dhiyaya

## WADADA LABBAAD

## DHIIRIGELIN

*'Dhiirigelintu waa sida cunto maskaxda la siinayo kagama dhergasid hal fadhi waa in aad ku soo noqnoqodka badisaa.'*

*_ Peter davies*

DHIIRIGELIN: waa hadal cid lagu geesinnimo galiyo si ay ku tallaabsato fal. Waa eray tamareed dadku ey ka shidaal qaataan si ey u gaaran hankooga iyo hadafkooga gaar ah. Dhiirigalintu waa dhaqaajiyaha naftaada waa ka sabab u noqda inuu qofku uu qabto hawl heerkeedu aad u sareeyo, gaadhsiyana natiijo aad u wayn waana furuha keena inuu qofku gaaro guul Tusaale: hadii aan ku iraahdo 300 boqol bir ayaan ku siin ee tag buurta fog ee kaaramardha isla markaba waa tagi maxaa yeelay dhaqaajiyahaagu waa lacagta, ogsoonaw gaadhigu ma socdo bilaa shidaal, dadkuna waa sidoo kale guul ma gaaran ilaay helaan dhaqaajiye (dhiirigalin) Hadaba dhaqaajiyaha nafeed waxaad kuheli kartaa adigoo naftaada tuso aragti fiican sidaa ayaad guul ku gaari kartaa insha allaah. Dhiirigalinta waxaa kamid ah ineey dadku kugu dhiirigaliyaan, inuu waalidkaaga ku dhalay kugu dhiirigaliyo hankaaga iyo himiladaada ama inaad adigu naftaada isku dhiirigaliso wanaaga. Qofka bini aadanka haduu helo dhiirigalin iyo daryeel joogta ah waxaan shaki ku jiri inuu nolosha guul ka gaari kuna noolaan si farxad leh.

Miyaadan is dhiirigalin karin ? se sidee u samaysan laheed dhiirigalin joogta ah ?

Haa waad is dhiirigalin kartaa waanad samaysan kartaa adigoo adeegsanaya qodobadan

- ❖ Naftaada ku kalsoonaaw
- ❖ Wakhtigaa ka faaiidayso
- ❖ Warqad ku qoro waxyaalaha ku dhiirigaliya
- ❖ Dhagayso muxaadirooyinka ku dhiirigalinayo
- ❖ Aragti fog yeelo
- ❖ Yeelo yool
- ❖ Naftaada adigu dhiirigali adigoo u adeegsanayo weedho dhiirigalin ah kuna dheh waad guulaysan  kartaa.iwm

**Weedho dhiirigalin ah**

Waad guulaysan kartaa

ha cabsan

Waad kartaa

waad baran kartaa

Isku day

halyeey ayaa tahay

Way fududahay

hormuud ayaa tahay

Waad ka soo bixi kartaa

waad samayn kartaaa

Hore u soco

geesi

Karti ayaad leedahay

way dhib yartahay

Adkayso

## MAANSO DHIIRIGELIN AH

maansadan dhiirigalinta waxaa tiriyay abwaan nuur deeq daahir (N.D.D)

- Noloshaaba Dhib iyo Dheef
- Waligeed Ku Dhisanoo
- Dharaartii Timaadaba
- Dhacdo Uguba Wadatee
- Ha Is Dhiibiin Waligaaa
- Hana Dhimin Hankaagii
- Himilada Dheeraaye
- Ka Dhabe UJeedada
- Qof Dhabar Adayga
- Guul Dhaliya Midhaheed
- Mar iyo Labo Waad Dhici
- Mar Saddexadna Wad Dhici
- Haka Dhigan Guul darada
- Dadku Ceebay Dhaliilaan
- Hana Noqon Dhagaystaha
- Dadka Dhoohan Hadalkood
- Diin bay Dad Dhaheen
- Buur dheer Ma kori karo
- waa Xayawaanka An Dhalin
- Guul uu ku Dhaashado
- Rajo Dhawristiisii
- Diin ba Dhabeeyoo
- Han Dedaalka Dhididkii
- Iyo Ficil Dhaqaaqii
- Buurta Dhalada uga Baxay

- Dadka Dunida Dhaqaaje
- Kolba Dhan u Hagayee
- Technology Dhamaystiran
- Daah Furkeeda Dhalan Rogi
- Xubin Adiga Kuma Dheero
- Dhagahoodu Maaha Afar
- Lix Dhaayood Malaha
- Sidka Aad Ku Dhalatayna
- Dharar Qudha Kama Danbayn
- Dhibtaad Marto Way Maraan
- kamana Dhidid Saydhid Badnide
- Dadaalkay Ku Dheer yihiin
- Hankii Dhaawac Gaadhana
- Himilada La Dhimatee
- Fikir Maanta kugu Dhashay
- Qabashadiisa Dib ha udhigan
- Markastaba Dhiiranaan soco
- Hana Dhiman Adoo Qaba
- Fikir Guula Dhalin kara
- waxkasto Dhici Kara
- Haka Dhigan Wax Dhici Karin
- Rag baa Dayaxa Ku Dhiiraday
- Guryo Inay Ka Dhistaan
- Dhawaana U Guuri Raba

# WADADA SADDEXAAD

## ISBADAL

*'Horumarku macquul ma aha isbedel la`aan kuwa aan maskaxdooda beddeli Karin wax kalena ma beddeli karaan.'*

*_George Bernard*

Isbadal waa marxalad qof ku jiro uun san ku qanacsanayn inuu uga gudbo marxalad kale uu ku qanacsan yahay taasina u horseedo guul, farxad iyo badhaadhe. isbadalkuna waa mid ka mid ah wadooyinka waaweyn ee guusha loo maro. Waxaa u ka bilaawdaa ruuxu inuu garta ama ka fikiro waxa xun ee ku sugan yahay dhibaatada uu naftiisa ku hayo. ka dibna uu doorto wado cusub oo uga baxo dhibaatadaas.

Hadaba Ma rabtaaa inaad isbadal sameeyso? hadeey tahay jawaabtaadu HAA tahay Inaad isbadal sameeyo saddex shay ayaa kaaga baahantahay.

i. Aamminid
ii. Rabitaan
iii. doorosho

- **Aamminid**

markaad rabtid inaad is badal sameeysid ugu horeyn waa inaad aamiintaa inaad isbadal sameykartid oo aad ka bixi kartid noloshan liidato aad ku jirtid ugana gudbi kartid nolol farxad. waa inaad sidoo kale aamintid in noloshaadu isbadali karto guulna aad gaari karto.

❖ **Rabitaan**

waa in ay kaa go'an tahay inaad isbadal sameeyso guulna aad gaadho aduunkana aad wax ku soo kordhiso markaas ayaa natiijada isbadalka aad ku raaxaysan kartaa.

Hadaad u haraada uun

Hadaad ku han waynta uun

Hadaad u raxlaayso uun

Hadaad u hayaanta uun

Hadaad ku han waynta uun

Hadaad u hilaawda uun

Hadaad ku hadaaqda uun

Hadaad ku hawaawida uun


Hubaal waad gaadhaysaa

Halkaad hiigso laheed.

Abwaan Cabdi qani mandhela

❖ **Doorosho:**

Wax kasta oo aad sameeysaa isbadal ayay keenaan, markaa waa in aad doorataa nooca isbadal ee aad rabto. ma isbadal taban mise togan iyo meesha aad isbeddelka ka billaawaysid. Ogsoonaaw meesha isbeddelka laga billaawo in eey tahay meesha ugu hooseya ee darajada isbeddelka taasi oo ah isbeddelka nafta.




Jaan.1.3. darrajada isbeddelka

Noloshu waxaay isbeddeshaa marka aad adigu isbeddesho hadii adigu isbadashidna waxaad wax ka badali kartaa bulshadaada aad la nooshahay, hadaad bulshada wax ka badishidna waxaad waxka badali kartaa caalamka ee ka bilaw isbadalka naftaada ku xiji bulshadaada kadib adigaa caalamka waxka badali doone. laakiin hadaad adigoon naftaada badalin aad tiraahdid bulshada iyo caalamka ayaan waxka badali. waad ku guuldarraysani waxayna kuu horseedi oo kugu dhici cudurrada ay ka midka yihiin walwal iyo walbahaarr. nin xikmad badan ayaa yiri "waxaan jeclaa dunida inaan isbadal ku sameeyo waxaanse ogaaday inaan isbadal ku samayn Karin illaan bulshadayda isbaddal ku sameeyo waxaan kaloo ogaaday inaan bulshada isbaddal ku samayn Karin illaaan qaraabadayda isbaddel ku sameeyo, waxaan ogaaday inaan qaraabadayda isbaddal ku sameeyn Karin ilaan nafteeyda isbaddal ku sameeyo. isbaddalka naftuna waa sirta guusha lagu gaadho."

Isbadalka noloshu natijadeedu in aad ku raaxaysato waxaay uu bahan tahay wakhti dheer, dulqaad, adkaysi, dhiiranaan  iyo inaad  quusanin.

**Sheeko xikmad leh: isbeddelka nolosha!**

Wiil dhalinyaro ah ayaa aad u niyad jabsanaa. Sanad kasta wuxuu isku dayi jiray inuu is bedel sameeyo hadana waxba iskama bedelin noloshiisa, dhibaaatadii heysay waxay ahayd sideedi, waxaana mar kasta ku kordhayay jahawareer iyo kadeed maalin ayuu wuxuu u tagay nin khabiir ah, wuxuu uga sheekeeyay xaalkiisi. Ninkii khabiirka ahaa ayaa ku yiri "ma garanaysaa inta sano ay qaaadato inuu ku koro geedka Bamboo la yidhaahdo noqdana mid aad u dheer?" sanadka u horeeya marka la beero, waa la waraabiyaa waana la bacramiyaa, waxba iskama bedelaan. waxaa la waraabiyaa hadana la bacramiyaa sanad kale oo buuxa, sida ayaana lagu wadaa saddex sano oo kale, waxba ma dhacaan, oo geedka waa sidiisi waxba iskama bedelin, ka dib sanadka shanaad wuxuu geedki isku shareeraa cirka! Lix asbuuc gudaheed geedki bamboo wuxuu kor u koraa 90 feet (27meter). Haddaba, intee bay ku qaadatay inuu sidaa aadka u dheer u koro? Wuxuu ninki dhalinyarada ahaa ku jawaabay, "lix asbuuc" khabiirkii ayaa ku yiri, taasi waa khalad, waxay ku qaadatay shan sano inuu sidaas u koro hadii qofkii beeray joojin lahaa inuu waraabiyo, bacramiyo, ka shaqeeyo markaa mid ah shantaa sano wuu dhiman lahaa geedka waxa dhacay shantaa sano waxay ahayd dhulka hoostiisa shabakad weyn oo xidido ah ayuu ku samaysanayay si ay u taageeraan koritaanka geedka bamboo. koriimadu waxay u baahan tahay dulqaad iyo kaladayg dhibic kasta oo biya ah farqi ayay u samaynaysay, talaabo kasta aad qaado raad bay reebtaa horay ka ma arki kartid isbadal laakiin koriimo ayaaa dhacaysa.

**Sirta isbeddelka**

Marnaba ma beddeli doontid noloshaada illaa aad beddesho waxyaabaha aad maalin waliba samaysid. Sirta guushaadu waa inaad hesho waxyaabaha aad maalin walba u qabato si joogta ah kadibna markaad hesho waxyaalaha aad ku liidato

badal. Sirta isbeddelkuna waa inaad diiradda saartid tamartaada oo idil, tamaartaasna aanad u isticmaalin burburinta wixii duugga ahaa balse aad u adeegsatid dhisida wax cusub.

*'Haddii aanad shay jeclayn, beddel. Hadii aanad beddeli Karin, beddel sida aad u aragtid iyo dhanka aad ka eegaysid.'*

*_maya angelou*

**Sidee balwad la is kaga dayn karaa**

Maleedahay balwad xun aad doonaysid in aad badashid oo aad ku badashid balwad fiican. taasi oo ku horkacayso in aad noloshaada horumariso wax kasta aad rabtan aad guul ka gaadho haday tahay jawaabtaduu Haa kaalay oo ila fuul doonta isbadalka doontaas oo ka qaadi doonta halkaa aad maanta taagan tahay kuna gayn doonta jasiirad aad u qurux badan oo aad naftaadu raali ku tahay in ay ku sugnaato oo ay mudo joogto. Balwad waxaa la iskaga dayn karaa:

**Habka SWOT**

SWOT waa eray English ah oo afsoomaali micnihiisu ku noqonaya DADAAL.
Habka SWOT waa habka ugu fiican ee balwad la iskaga dayn karo, naftaadana aad ku horumarin kartid, isbadal la taaban karana aad ku gaari karti.
SWOT waxaa loo soo gaabiyay
S – strengthness oo micnaheedu yahay waxaad ku fiicantahay sii kordhi.
W – weakness oo micnaheedu yahay waxaad ku liidato yaree.
O – opportunites oo micnaheedu yahay fursadaha ka faa`iidayso.
T – treats oo micnaheedu yahay saameeynta dadka iska ilaali

**Habka SWOT waxaad u isticmaali kartaa sidan**

1. Qor wax yaa laha  aad  ku fiicantahay ee aad doonayso in aad kordhiso
2. Qor waxyaa laha aad  ku liidato  ee aad doonaysid in aad yarayso
3. Qor fursadahaaga aad doonaysid inaad ka faa'iidaysato
4. Qor dad ku waxa yaalaha ay kugu saamaynayaan.

Tusaale ahaan waxaad samaysataa habraacan oo kale. habeen kastana sax waxaad soo sameeysay, khaladna waxaadan soo sameeyn.

| **Strength** | **Sabti** | **Axad** | **Isniin** | **Talaado** | **Arbaco** | **Khamiis** | **Jimce** |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Salaada tukasho | √ | √ | √ | | | | |
| Jimcsiga | × | √ | √ | | | | |
| Quraan akhriska | √ | √ | √ | | | | |
| **Weakness** | | | | | | | |
| Sigaarka | × | × | √ | | | | |
| Jaadka | √ | √ | √ | | | | |
| Khamrada | √ | √ | √ | | | | |
| **Opportunites** | | | | | | | |
| fasaxyada | √ | × | √ | | | | |
| Fursad kadis ah | × | × | × | | | | |
| **Treats** | | | | | | | |
| Hadalka xun | √ | √ | √ | | | | |
| Balwada xun | × | × | √ | | | | |
| | | | | | | | |

Jaan.1.4.habraaca qiimaynta ee SWOT

**Maxaa kuu diidan inaad isbeddel samayso ?**

inaad isbeddel sameyso waxaa kuu diidan shayo badan oo ay ka mid ka yihiin:

- Baraarug la'aan
- cabsida guuldarrada.
- go'aan la'aan.
- Rabitaan la'aan.
- Adkaysi la'aan.
- Xamaasad (laab la kaca)
- Cabsida isbeddelka
- Wakhti lumiska
- Wahsiga
- caajiska
- waxaad qortaa sagaal shay oo rabtid inaad isbadel ku sameysid kadib go'aanso oo baddel.

1) ……………………………………………………………...................................
2) ……………………………………………………………………………...
3) ……………………………………………………………………………..
4) ……………………………………………………………………………..
5) ……………………………………………………………………………..
6) ……………………………………………………………………………...
7) ……………………………………………………………………………..
8) ……………………………………………………………………………..
9) …………………………………………………………………………….

# WADADA AFRAAD

## HADAF

*'Qofka guulaystaa waa kan leh hadaf kaas oo aan weligii niyad jabin.'*

*_Nelson mandela*

Waa maxay hadaf?

Hadafku waa dariiqii aad ku xaqiijin lahayd ama hanaanka aad ku gaadhayso guul kaasi oo ka kooban tallaabooyinka aad u qaadayso xagga yoolka kuu dajisan. noloshaada haddaba inaad  hadaf ka yeelatid  waa furaha hormarka noloshaada haddii aadan nolosha hadaf  u dajin waxaa kula soo gudbayo guuldarrooyin fara badan. Waa in aad  yeelataa hadaf si aad iskaga ilaaliso in aad ku jahwareerto guuldarrooyinka yar yar.

*'Yoolalkaaga meel sare ku laal, hana istaagin illaa aad halkaas gaadho.'*

*_bo jackson*

**Faa'iidooyinka hadafka**

Cilmi baadhistii YALE University ee yoolka

1953kii waxay samaysay jaamacadda YALE cilmi baadhis ay ku ogaanayso ardaydeeda ganacsiga iyo yoolalka ay dhigteen, ardaydaasi oo ay wadartooda ahayd 10,000 (toban kun) waxay cilmibaadhistaasi soo saartay, in 93% aanay lahayn hadaf cad ee ay iska noolyihiin, halka 3% ay leeyihiin hadaf waliba ay qorteen, iyadoo la ogaaday 20 sanno ka dib oo ku began 1973kii in intii qoratay ee 3% ahayd ay ka guul gaadhay oo ay la maal noqdeen marka la isku wada daro 97% kii soo hadhay. Cilmi baaristana waxaay na tusaysaa ahamiyada in hadaf nolosha laga sameysto.

**Sheeko xikmad leh: hadaf la'aantu waa guuldarro**

Nin baa beri magaalo weyn dhex lugeeyey isaga oo iska socda oo aan wax hadaf ah lahayn. Markii uu in badan socday ayaa waxa uu gaadhay isaga oo daallan meel isgoys ah oo ay dhawr waddo iska gooyaan. Inta uu istaagay ayuu nin waayeel ah oo meel u dhow marayey wax weydiiyey. Inta uu mid ka mid ah waddooyinkii dhawrka ahaa farta ku fiiqay ayuu waayeelkii su'aalay: "Waddadani halkee ayey i geynaysaa?" Ninkii waayeelka ahaa ayaa isla isagii su'aal kale ka hor keenay oo ku yidhi: "Horta adigu xaggee ayaad tegaysaa?" Ninkii ayaa yidhi: "Waan iska socdaa oo ma jirto meel ii qorshaysan oo aan tegayo " Waayeelkii ayaa isaga oo yaabban ninkii ku yidhi: "Hadduu sidaas xaalku yahay, jidkaad doonto iska mar kolay meel uun buu ku geyne!"

**Shuruudaha hadafka**

Waxaa lagu soo koobaa qodobbada ugu muhiimsan shuruudda u ah sameynta ama dajinta hadafka kalmad English ah oo la yidhaahdo SMART

**S- specific** xad leh: waxaad rabtid inaad xaqiijiso ha noqdo wax xad leh(go'an)

**M- measurable** qiyaas leh: waxaad rabtid waa inuu noqdo wax qiyaas leh

**A- achievable** la gaadhi karo: waxaad xajiijinayso waa inuu noqdaa wax la gaaro

**R- reality** suura gal ah: waxaad rabto yuun ahaanin khayaali

**T- timebale** wakhti go'an leh: waa inaad wakhtigaad ku soo dhamaynasid hadafkaaga aad garanaysid ,ma ahan inuu noqdo waxaan wakhti laheen.

*"markaad rabtid inaad nolosho meel heersare ka gaadho waxaa hubaal ah in seddexda C (3C) caqabado, cabsi iyo cudurdaarku ay kuu diidayaan inaad gaadho hadafkaaga  noloshaadana aad maarayso laakiin waxaad kaga gudbi kartaaa hadafkaagana ku gaari kartaa sedexdanD (3D )dadaal, dulqaad, iyo daacadnimo."*

*_yaxye yaasiin xasan*

**Aqoonyanadu waxay hadafka ka yiraahdeen**

**Tomos killer** wuxuu yidhi: ‘hadaf la’aan waxaad noqon sida dooni aan lahayn meel ay ku soo xidhato safarkeeduna ku dhamaado inay burburto oo gobolo yaryar noqoto.’

**Confucius** wuxuu yidhi: ‘marka ay caddahay in aanad yoolkaagii gaadhi karaynin, ha beddelin yoolka ee beddel dhabbada aad u maraysid.’

**James Cameron**  wuxuu yidhi: ‘hadii aad ku laasho yoolkaaga meel aad u sarreysa oo aad guuldarraysato, waxa aad ku soo dhici doontaa meel ka sarreysa dadka kale oo dhan guushooda.”

**Helmut Schmidt** wuxuu yidhi: ‘mid kasta oo raba in uu gaadho yool fog waa in uu gaadho tallaabooyin yaryar.”

**Cabdilaahi suldaan maxamed (timacadde)** wuxuu yidhi: ‘lama helo wadaadoow waxaan cidi ku hawshoone, naftaa loo hanqal taagaa waxaad hiigso leedahay.”

**Albert eistein** wuxuu yidhi: ‘hadii aad doonayso in aad nolol farxad leh noolaato, noloshaada ku xidh himilo iyo yool oo ha ku xidhin shakhsiyaad iyo wax kale.’

**Xikmad** ayaa tidhaahdo: ‘furaha farxaddu waa inaad riyo iyo hiigsi yeelato, furaha guushuna waa in aad riyadaada rumayso.’

# WADADA SHANAAD

## QORSHE

*'Haddii aad ku guuldarraysato inaad qorshe  sameysato waxa aad qorshaysatey guuldarro.'*

*_qoraha la ma yaqaan*

Markaad rabtid inaad sameyso hawl waxaa muhiim ah inaad qorshaysatid sida aad u fulin laheed iyo wakhtiga aad ku fulin laheed hawshaada. waa inaad ka digtoonaataa hawluhu inay iskaga kaa dhexyaacaan, maxaa yeelay is dhexyaacu waa jahwareer waxayna kaa hor istaagi inaad guul gaadho.

Qorsha lagu meel maraa

Naftaada lagu mareeya

Markastana lagu socdaa

Qorshaa maskax dhaloo

Waxaad maagantihiyo

Meeshaad hiigsanayso

Muftaaxa lagu furo weeyaan

Qorshuhu waa laga marman

Miciinka noloshaada weeyaan

Hagaha masxadaada weeyaan

Abwaan nuur deeq daahir (N.D.D)

# WADADA LIXAAD

## DADAAL

*“ Dadaala xaaji cabaas wuu gaara .”*

*_Mahmaah soomaaliyeed.*

Dadaalku waxaa weyaan furaha ugu muhiimsan ee guusha lagu gaadho. kuwa guulaysta iyo kuwa guuldarraysto waxaay is dheer yihiin kaliya waa dadaaalka. Hadaba hadii aad rabto ina aad nolosha meel heer sare ka gaadho kuna noolaato nolol fiican dadaal joogta ah la imoow.


Albert Einstein oo ahaa sayniskii ugu caansanaa qarnigii 20[aad] mar wax laga wey diiyay guusha iyo dadaal waxaa uu yidhi:

*‘Guushu waxaay saamigal toos ah la tahay dadaalka.’*

Hadii aan u badalo odhaahdiisa qaacido xisaab ahaan waxaay noqonaysaa sidan.

$$G = KD$$

Odhaahda micneheegu waxaa weeye hadii dadaalku kordho guushuna waay badataaa, hadii dadaalku yaraadan guushu way yaraataa. fiiri graphy kan si aad si fiican u fahanto qaacidada.




Jaan.1.5.dadaal iyo guul

Hadaad riyo leedahay oo doonaysid in eey kuu rumoowdo dadaal joogta ah la kaalay iyada ayaa ku rumoobi. Xikmad greek ah baa tidhaahdaa

*"marka aynu dadaalno baa ilaahay inoo fududeeyaa waxaynu ku dadaalnay."*

Bal aan kula wadaago qisadii Thomas Edison iyo siduu u dadaalay si uu u rumeeyo riyooyinkiisi.Thomas alva Edison oo ah ninka saddexaad ee ugu ikhtiraaca badan ikhtiraacayna laydhka aan shidano ee guri walba ku jira qof kastaana ku raaxaysanayo adeegsigooda waxaa uu ku gaaray riyadiisa waa dadaalkiisii joogtada ahaa ee uu samaynayay. Thomas Edison wuxuu ahaa markii uu yaraa ilmo yar oo su'aalo badan wax kasta oo uu arkana su,aal buu iska waydiin jiray dadkana waydiin jiray muxuu sidaa u yahay? maxaa u sababa?, faa'iidadiisu maxay tahay? hadii xataa jawaabta uu ku qanci waayana wuxuu ba isku dayi jiray inuu isaga laftiisu gacanta u la tago oo uugaado. Thomas Edison markii uu gaadhay waqtigii iskuulka ayaa lageeyay laakiin nasiib daro mudo badan kuma sii jirin iskuulka. Wax kasta oo loo dhigo wuu iloobi jiray sidaa daraadeed wuxuu ahaa ardayga ugu liita fasalkiisa. Macalimiintiisuna way ka quusteen waxaanay ku tilmaameen qof yar oo ay wax u dhiman yihiin. Caruurta iyo macalimiintuba way ku caayi jireen saaqidnimadiisa. Maalin walba isaga oo ooyaya ayuu hooyadii ku noqon jiray xataa dhakhaatiirtu waxay saadaaliyeen inuuna caadi ahayn. ugu danbayntii maamulkii iskuulka wuu kasoo eryayay waxaanay xujo ka dhigteen inaanay dugsigu in uun ahayn meel dadka caqli gaabka ah loogu tala galay. dadaalka ugu badan hooyadii ayaa u gashay markii danbe oo ku dadaashay sidii ay wax u bari lahayd gaar ahaan akhriska iyo qoraalka. Waxaanay ku dadaashay sidii ay kalsooni naftiisa ugu beeri lahayd. Wuxuu bilaabay inuu wax kasta oo uu arko akhriyo habeen iyo maalina wax akhriyo. Mudo sadex sano ah ayay hooyadii wax baraysay. Markuu gaadho toban jir ayuu aabihii wuxuu u keenay buuga saynis ah oo ah manhajkii waqtigaa la dhiganayay. Manhajkaas oo ay ku jirtay daahfurkii

saynis ee waqtigaa la gaadhay. Buugtaasi Thomas alva Edison waxay uu ahaayeen guul wayn oo usoo hoyatay. Markii danbe Thomas Edison wuxuu ogaaday inaanay akhriska oo kaliya aanay anfacayn ee loo baahan yahay inuu tijaabooyinka gacantiisa ku sameeyo. Wuxuu samaystay shay baadh gurigiisa dhexdiisa ah. Wiixii uu lacag heli karayayna wuxuu ku iibsaday wixii qalab ah ee uu u baahnaa si uu tijaabooyin u samayn karo. Sanad kadib waxaa reerkoodii ku dhacay faqri aan caadi ahayn. Thomas edison wuxuu go,aansaday inuu shaqo galo. Wuxuu bilaabay inuu jaraaidka ku iibiyo tareenada dhexdooda. Inkasta oo hooyadii markii hore diiday arinkan da,diisa oo aad u yarayd awgeed iyo iyada oo ka baqaysay inuu tareenka ka dhaco ilayn waa hooyee, hadana ugu danbayntii wuu ku qanciyay. Qorshihiisuna wuxuu ahaa inuu jaraa'idka wixii ku qoran oo dhana akhristo oo hadana iibiyo da,adiisu waxay ahayd laba iyo toban jir waqtigaas. Mudo kadib Thomas Edison wuxuu tareenka dhexdiisa ka samaystay maktabad iyo shay baadh yar oo uu tijaabooyinkiisa ku wato. Maalin maalmaha ka mida ayuu tareenkii meel duqeeyay markaasaa waxaa soo wada daatay daasadihii iyo quraaradihii ay ugu jireen kimikooyinka uu tijaabada ku wado. Kadib maamulkii tareenka way ka eryeen tareenkii alaabtiisiina dibada ayay ugu tureen. laakiin Thomas edison arintaasi may niyad jabin wuxuu hadana go,aan ku gaadhay inuu wato shaqadiisa oo tareenada kale u wareego. Markii danbe wuxuu wax ka bartay qalabka isgaadhsiinta ee waqtigaa jiray oo la odhan jiray telegraph sida uu u shaqeeyo oo dhan kadibna horumarin buu ku sameeyay dadkuna waxay la yaabeen horumarka uu soo kordhiyay oo fududeeyay isticmaalka telegraafka. Mudo yar ka dib ikhtiraacaadkiisii ayaaba batay markii la qiimeeyayayna lacag aad u badan ayay ku qiimeeyeen isaga oo wali da,diisu yartahay.

Qisadiisa ah inuu ku hamiyo soo saarida laydka aynu maanta shidano waxay ka dhalatay markii uu arkay baahida wayn ee loo qabo laambad yar oo guriga lagu

xidho oo iftiinta. thomas edison ayaa intuu fuulay meel sare magaalada dusha ka eegay wuxuu arkay magaalo madaw. Wuxuuna sawirtay isaga oo magaaldaas ku ifiyay laambado ifaya oo qiimaheeduna jaban yahay qof kastaan shidan karo. Waxay noqotay riyo maskaxda thomas edison ka dhexguuxda habeen iyo maalin. Ugu danbayntiina wuxuu ogaysiis ku bixiyay inuu doonayo inuu sameeyo laambadaas aan gubanayn ee ifaysa mudo fara badan. thomas edison waxaa ka hor timid mucaarado aad u wayn gaar ahaan sharikaadkii gaaska kuwaas oo u arkayay Thomas wax soosaarkiisu inuu duulaan ku yahay sharikaadkooda. Maxaa yeelay dadku gaaska way ka maarmi doonaan hadii ay helaan laambada uu Thomas edison ku hamiyayo soo saarideeda. Dagaal adag bay la galeen Thomas edison wuxu bilaabay hirgalinta qorshihiisa. Habeen iyo maalinba shaqo isdaba joog ah oo aan nasasho lahayn. Marka uu tijaabo ku fashilmaba mid kale ayuu guda galaa. Ugu danbayntii dadkii la shaqaynayay oo dhan ayaa quus gaadhay iyadoo sidaa ay tahay hadana Thomas eddison waa sii waday shaqadiisa. Ugu danbayntiina sharikaadkii maalgalinayay ayaa ka joojiyay maalgalintii waxayna u arkeen inuu Addison khasaarinayo oo waxan uu ka sheekaynayaa ayna suuragal ahayn soo saaristoodu. Laakiin Thomas edison wuxuu rumaysnaa iimaan qoto dheer inuu guulaysanayo maalin uun inkasta oo dadkii kale oo dhani quusteen. Wuxuu raadiyay cid kale oo maalgalisa. Thomas Edison wuxuu sii xoojiyay shaqadiisa wuxuuna gaadhay heer aanu seexan oo aanu cunto doonan oo cuntada daaqada ayaa looga dhiibi jiray wuxuuna cuni jiray isaga oo taagan. Wuxuu hal hayskiisu ahaa ‘**guul ama geeri.’**

Ugu danbayntii Thomas Edison wuxuu ku guulaystay hadafkiisii wuxuu sameeyay laambad ifaysa oo guri kasta laga shidan karo. Waxaa daawasho ugu yimid dadkii oo dhan meel ay kala joogsadaana waayay iyaga oo layaaban waxsoosarkan cajabta leh. Halkaa ayaa waxaa ku xaqiiqoobay riyadii Thomas Edison ee ahaa

inuu magaalada mugdiga leh iftiimiyo.Wuuna ku guulaystay riyadiisii. Waxay yidhaahdaan wuxuu fashilmay maraar badan iyadoo taasi jirtana ma niyad jabin mana quusan ismana dhiibin inkasta oo ay quusteen saaxibadii iyo dadkii maalgalinayay oo dhan.

*'Guushu 99% waa dhidid sayrid , 1% na waa dhiirigalin.'*

*_Thomas Edison*

**Sheeko xikmad leh: Dadaalaa waa gaaraa**

Ardey caajisloow ah, habeenkiina dhafri jiray, ayaa maalin maalmaha kamid ah, waxa uu kasoo qeyb galay, muxaadaro kasocoty jaamacad, taasoo macalinku uu ku sharaxayey cilmiga xisaabta iyo dhibaatada laga maro barashadiisa. Ardeygii ayaa fasalkii ku dhex hurday ayadoo muxaadaraadii socoto, waxa uuna soo toosay ayadoo fasalkii lagu kala dareerayo, durbadiiba inuu baxo ayuu bilaabay, balse wuxuu eegay sabuurada, wuxuuna arkay qoraal xisaabeed aad u fara badan oo ku xardhan sabuurada. Ardeygii ayaa fasalka kusoo noqday, waxa uuna bilaabay inuu min guuriyo wixi sabuurada ku qornaa, isagoo buugiisa ku qoronaya, waxa uuna naftiisa ka dhaadhiciyey in waxani yihiin, waajib ama shaqo guri oo loo diray ardeyda si ay usoo xaliyaan. Ardeygii ayaa guriga la aaday qoraalkii badnaa, ee soo miin guuriyey, waxa uuna guda galay in uu xal u helo dhowr su,aalood oo aad u adkaa, isagoo waxbadan waqti ku lumiyey matbacadaha iyo buugaag aqrinta. Ugu dambeyn dadaal dheer kadib waxa usuura gashay inuu xal usoo helo su,aalihii. waxa uuna kusoo laabtay jaamicadii isagoo doonayey inuu soo gudbiyo wixii uu kasoo shaqeeyey. Macalinkii ayaase yiri: Su,aalaha sabuurada ku qornaa ma aysan ahayn shaqo guri(home work), mana amrin ardeyda in ay kasoo shaqeeyaan, ee maxaa adiga kugu kalifay in aad kasoo shaqeyso?. Ardey ayaa yiri: Ya Allah, waqti badan iyo dhafar badan ayaan u galay in aan xal u helo, adigana

waxaa leedahay shaqo laguu diray ma ahan. Macalinkii ayaa yiri: Su,aalaha sabuurada ku qornaa, waxey ahaayeen qaar ka mid ah tusaalooyin aan ardeyda siinayey, tusaalooyinkaasna waxey ka mid yihiin su,aalihii ay ka cajiseen ama xal u waayeen culimadii ugu weynaa ee cilmiga xisaabta. Ardeygii ayaa yaabay, waxa uuna yiri: Macalin anigaaba xal usoo helay, waxa ay culimadu ka caajiseene. Kadib  markii la xaqiijiyey, daraasado badana lagu sameeyey ayaa la ogaaday in ardeygaasi uu si sax ah u xaliyey mas,alado boqolaal sano xal loo weysanaa oo cilmiga xisaabta ah. Hadiise uu soo jeedi lahaa ardeygaasi wuxuu aamini lahaa in su,aalahani yihiin mustaxiil xal u helistoodu, mana uusan isku howleen baarista iyo maskax adeegsiga.

## Halganka

‘Halgan la’aan, ma jiri karo horumar.’

_Frederick dougles

**Sheeko xikmad leh : halganka**

Macalin Biology ayaa barayay ardaydiisa sida diirtu(diirdiir) ay isagu bedesho balanbaalis. Wuxuu ku yiri "labada saac ee dambe balanbaalistan waxay la halgami doontaa siday uga soo bixi lahayd qolofta ku dahaaran, qofna yuusan caawin." Wuuna tagay. Ardaydi waa sugeen wayna dhacday. Balanbaalisti waxay larafatay inay ka soo baxdo qolofta, Arday ayaa ka naxay wuxuna go’aansaday inuu caawiyo siday u soo bixi lahayd, iskana dhegatiro waanadi macalinkiisa. Wuxuu jebiyay qolofti si ay uga soo baxdo oo aysan u halgamin waxbadan. Balse wax yar ka dib balanbaalisti waa dhimatay! Goortii macalinka soo noqday, waxaa loo sheegay wixi dhacay. Wuxuu u sheegay ardaygi "caawintaada darted ayaa dishay balanbaalista sababtoo ah waa sharci Rabaani ah oo Alle ugu talagaly in halganka ay kaga soo baxayso qolofta uu run ahaantii ka caawiyo in uu horumariyo xoogna

siiyo garbaheeda. Wiilki ardayga taa ayuu u diiday."Tani aan ku dabaqno nolosheena. Wax qiimo leh nolosha lama helo lamana gaaro halgan la’aan iyo dhibtoodo la’aan

Qof baad tahay guul abuura
Qof baad tahay guri yagleela

Qof baad tahay gaar ahaantiisa

Ku gaajo baxoo iskeena

Gankaa kuma dheer caara

Aqoontaaduna ma gaaabna

Ma gaagixin aayahaagu

Dadkaaguna kuma girifine

Dalkaaagana kama go`aysid

Gob`baad tahay moog inteeda

Abwaan xasan daahir weedhsame

Markaad hindisaha qorshayso

Si aad hirashada u dhabayso

Hawshaada dedaal ku biirsho

Abwaan abdiraxmaan cismaan cumar

## WADADA TODDOBAAD

## SAMIRKA IYO DULQAADKA

*‘Markaad rabto nolosha inaad guul ka gaadho ha moogaan samirka iyo dulqaadka oo ah labada shay ee aan noloshu ka maarmi Karin si aad uga badbaado guul daro. samirku waa sahayda guusha, dulqaadkuna waa shidaalka.’*

*Amaal bashiir garaase*

Samirku waa halbawlaha shay wal oo la qabanayo, samirku waxa uu uga taagan yahay arrimaha halka uu madaxu uga taaganyahay jidhka samirku waa hoyga halyeeyada adduunka ,lama arag adduunka nin libaaxa hadii la arkayna waxa uu ku mutaystay halyeeynimada adkaysi iyo u dhabar adayg uu u dhabar adaygo dhibaatooyinka soo maraya, haddaba adduunka lama arag cid bilaa Samir ah oo guuleysata. maxaayeelay markaad wadada guusha maraysid waxaa kaa hor bixi ama ku soo wajihi guuldarrooyin farabada, caqabado, niyad jab, hanjab iyo quusasho laakiin waxaas oo dhibaataa waxaad kaga bixi kartaa Samir iyo dulqaad soomaalidu waxaay ku maahmaahdaa “ nin samraa sad leh.”

**Ma guuldarraysanaysid hadii aanad ka hadhin himiladada**

Abrahan Lincoln wuxuu ku dhashay 12 february 1809kii Hodgenville, Kentucky abrahan Lincoln hooyadii iyo abbihii waxaa ay ahaayeen danyar sabool ah waxay daganaayeen guryo kirro ah oo iyagu aysan lahayn. waxbana ma haysanin noloshooduna aad ayay u liidatay, Abrahan Lincoln yaraantiisi noloshaas mugdiga ah ayuu ku soo koroy. Abrahan Lincoln markuu yar koray hooyadiis oo aad u jeclayd in uu wax u barto wiilkeedu si uu nolosha sabooltinimada ugu saaro ayaa waxaa ay ku dartay iskuul. laakiin nasiib darro hooyadiis way awoodi waysay in ay lacagta iskuulka ka bixiso wiilkeeda si uu wax ugu barto oo uu noloshan mugdigaa uga saaro. Abrahan Lincoln hal sano kaliya ayuu dhigtay iskuulka caadiga laakiin

aqalkooda dhaxdooda ayuu wax isku bari jiray aadna wax uu ugu akhriyi jiray. Abrahan Lincoln isaga ayaa naftiisa waxbaray hooyadiina waay ku dhiirigalin jirtay inuu naftiisa waxbaro, waxayna siin jirtay waxwalbo uu uga baahdo xageeda. 1818kii hooyadiisi uu aadka u jeclaa ee dhiirigalin jirtay ayaa dhimatay Abrahan Lincoln aad ayuu uga murugooday dhimashada hooyadii waxayna ku noqotay boog aan ka go'ayn toban sano kadibna walaashii oo ahayd qofta kaliya xafadooda u shaqaysa oo biisha ayaa dhimatay. dhimashada walaashii kadib Abrahan Lincoln waxaa uu go'aan ku ku gaaray inuu shaqaysto oo biilka xafada isagu bixiyo Abrahan Lincoln waxaa uu ka shaqa galay dukaan oo uu ka ahaa dukaan haye xagaas ayuu ka shaqayn jiray oo nolol maalmeedkiisa kala soo bixi jiray muddo laakiin nasiib darro waa laga eryay shaqadiisi iyada oo loo aanaynayo inaanu lahayn dulqaad kadib markuu shaqadii laga eryay wuxuu ku biiray siyaasada. 1832kii waxuu uu tartamay goloha deegaanka (state legislature) laakiin waa uu ku guuldarraystay is la sanadkaas wuxuu go'aansaday inuu galo kuliyadda sharciga. Laakiin u ma ay suurrobin in uu galo kuliyadda waxaase uu qorshaystay inuu cilmiga sharciga isagu is barro waxaana uu soo iibsaday buugta laga dhigto sharciga habeen iyo maalinna wuu akhriyi jiray ilaa uu noqday qareen sharci yaqaana. Taariikhdu markay ahayd 1833kii Abrahan Lincoln wuxuu lacag ka daynsaday saaxiibadii si uu ganacsi ugu bilawdo laakiin wuu ku guuldarraystay ganacsigaas sanadkii xigay 1834 wuxuu mar labaad u tartamay goloha deegaanka Illinois markanse wuu ku guulaystay waxaa uuna ka mid noqday xildhibaanada goloha deegaanka Illinois. aadna wuu ugu farxay maxaa yeelay waxay ahayd markii ugu horeeysay oo uu nolosha guul ka gaadho. 1835 tii wuxuuna qorshaystay inuu guursado Ann rutledges oo ahayd gabadh ay is jeclaayeen, mudo badana wada sheekaysanayeen, nasib darro maalmo yar markay arooskii ka harsantahay ayaa Ann rutledges dhimatay Abrahan Lincoln jaceyl iyada uu qabay darteed waxaa ku dhacay xanuun dhinaca neerfaha ah wuxuuna lix billood yaalay

hosbitaal. 1838kii waxaa uu isku sharaxay afhayeenka golaha deegaanka (state legislature speaker) wuu se ku guuldarraystay mudo kadib wuxuu u tartamay congress-ka misena wuu ku guuldarraystay. 1848 wuxuu ku guuldarraystay dib u magacabistii congresska inuu ka qayb qaato, sanad kadib na waxaa loo diiday land officer inuu noqdo 1854 wuxuu u tartamay. U.S senate ama golaha sare maraykanka laakiin wuu ku guuldarraystay. 1856 wuxuu isku sharaxay madax wayne ku xigeen hadana wuu ku guuldarraystay hadana mar kale sanadkii 1858 wuxuu ku guuldarraystay inuu senater noqdo intaas oo guuldarro ka dib 1860 wuxuu ku guulaystay in loo doorto madaxwaynaha dalka maraykanka isagoo taariikhdana ka galay madaxwaynayaashii maraykanka kuwii ugu qiimaha badnaa maxaa yeelay waxaa uu xorreyey dadkii madoobaa ee la gumaysan jiray ama wuxuu tirtiray ka ganacsiga adoonta (slave trade) waxaa kaloo uu mideeyay gobollada koonfureed iyo waqooyi ee maraykanka xiligii dagaalkii sokeeye.

| **Sanad** | **Da'da** | **Guuldarro iyo guul** |
|---|---|---|
| 1816 | 7 | Guryihii ay daganaayeen ayaa laga saaray. |
| 1818 | 9 | Hooyadii ayaa dhimatay. |
| 1828 | 19 | Walaashii ayaa dhimatay. |
| 1831 | 22 | Shaqadii ayaa laga eryay. |
| 1832 | 23 | Wuxuu u tartamay golaha deegaanka, waa ku guuldarraystay. |
| 1833 | 24 | Ganacsigii ayuu ku guuladarraystay. |
| 1834 | 25 | Wuxuu u tartamay mar labaad goloha deegaanka ,waa ku guulaystay. |
| 1835 | 26 | Gacalisadiisi ayaa dhimatay. |
| 1836 | 27 | Waxaa ku dhacay xanuun nerve ah (nervous breakdown). |
| 1838 | 29 | Wuxuu u tartamay afhayeenka golaha deegaanka,wuu ku guuldarraysta |
| 1843 | 34 | Wuxuu u tartamay goloha shacabka (congress), wuu ku guuldarraystay |
| 1846 | 37 | Wuxuu u tartamay mar labaad goloha shacaka, wuu ku guulaystay. |
| 1848 | 39 | Dib loo ma soo dooranin ama lama soo magacaabin. |
| 1849 | 40 | Waxaa loo diiday land officer inuu noqdo. |
| 1854 | 45 | Wuxuu u tartamay golaha sare (senate) wuu ku guuldarraystay. |
| 1856 | 47 | Wuxuu isku sharaxay madaxwayne ku xigeen , wuu ku guuldaraystay. |

| | | |
|---|---|---|
| 1858 | 49 | Wuxuu u tartamay mar labaad golaha sare wuu ku guuldarraystay. |
| 1860 | 51 | Waxaa loo doortay madaxwaynaha mareykanka (USA). |

Jaan.1.6.guushii iyo guuldarradii Abrahan Lincoln

**Cid aan adiga ahayn kama masuul aha guul iyo guuldarro kasta oo kula soo gudboonaata.**

boqorkii la odhan jiray Napeleon Puna Part, oo markii laga adkaaday loo mastaafuriyey jasiiradda Sant Helena, waxa uu yidhi; "Qof aan aniga ahayn kama masuul aha hoogayga iyo jabkayga." Isaga oo hadalkiisa sii watana waxa uu intaa raaciyey; "Waayo, waxaan ahaa cadowga ugu weyn ee naftayda."

**Sheeko xikmad leh: ugaadhsade iyo shimbir**

Nin ugaadhsade ah baa maalin maalmaha ka mid ah ugaadhsi tegay. Wuxu maalintii oo dhan keynta dhex jibaaxaba, markii uu waayey wax ugaadh ah oo wakhtiguna noqday goor casar gaaban ah oo ninkiiba damcay inuu iska hoydo, ayuu shimbir ku taagnaa geed aan isagaba sidaa uga durugsanayn halkaa ka ciyey. Ninkii baa qalabkiisii ugaadhsiga ee uu xareeyey intuu la soo baxay ayuu si fiican shimbirkii u shiishay oo deeto dhulka soo dhigay. Shimbirkii baa markii uu ugaadhsadihii gacanta ku dhigay ku calaacalay oo yidhi "illeen nabadgelyadayduba waxay ku jirtay aamusnaanta, oo haddii aan iska aamusi lahaa illeen w'aan nabadgelilahaa."

*'Farxad ma dareemo nimaan murugo arag !*

*Nimco ma dareemo nin aan xanuun arag!*

*Raaxo ma dareemo nin aan rafaad arag!*

Guul ma dareemo nin aan samir lahayn!

## TALOOYIN WAX KU OOL AH

- Garwaaqso naftaada.
- Ahaw naftaada.
- Ku kalsoonoow naftaada.
- Maree noloshaada.
- Habee noloshaada.
- Kobci aqoontaada.
- Dhis aqoontaada.
- Naftaada daryeel.
- Sameyso noloshada.
- Dhiirigeli naftaada.
- U fikir si kale.
- Fuli fikradahaaga.
- Wanaaji rajadaada.
- Samir yeelo
- U foojignaw naftaada.
- Hano hankaaga.
- Badi yididiiladada.
- Yeelo yool.
- Qeex hadafkaaga.
- Sameyso qorshe.
- Qiimee qorshahaaga.
- Ku dadaal………..
- Hore u soco.
- Wakhtigaaga ka faaiidayso.
- Samee jimicsi

## TACAB

Meerisyadan gabayga ahi waxay kamid yihiin gabay ka hadlayay tacabka wanaagsan ee lagu gaadho guush gabaygaas oo magaciisu aha TACAB Waxaana tiriyay maxamed khaliif ibraahin (xaraash)

- ❖ Aduunyadan nin taagdarani waa lama tabaankiiye
- ❖ Taajir iyo ninkii xoog leh buu uun ku tiriyaaye
- ❖ Miskiin tacadi haystaa ileen ruuxna tabi waaye
- ❖ Hadii uu tafaha xayto uu tacab u qaan shaarto
- ❖ Maruun buu wuxuu tiigsadaba taas ka baxayaaye

- ❖ Nin tabcaday wuxuu taransaduu toos uhelayaaye
- ❖ Tashan waaye aan garan maradan tolo dilaacaysa
- ❖ Oon tashiilan maalkuu tabcaday amase tuurtuura
- ❖ Sadexdaas nin waa laga tagayee taas hala ogaado
- ❖ Tubta nolosha kii seega ee tooyo garan waaya
- ❖ Taladuu ka baydhuu hadhaw dib ula taahaaye
- ❖ Oo uu tola' ayeey dhehaa taas ma garanayne

- ❖ Anigoo tabtaas aaminoo kana tusaalaystay
- ❖ Qaaraabiyo tolaan kaashadiyo ehel itaageera
- ❖ Talo iyo anoon dhiiri galin taakuliyo waano
- ❖ Cidna iila taagnay dunida tu alla mooyaane
- ❖ Tacliin iyo aqoon tag yaraan soow ma taban taabin

- Aniguba tagoogiyo mar baan turuqyo waynaaye
- Tifkaas waxaa iga dhigayee aan la tabar belay
- Tunkan qaadhay dhafoorahan itagay lafahan tag taagan
- Tacliin iyo waxa iigu wacan tiigsigaan wado e

- Maruun baad tanaadida waxaan tab ka galiyaaba
- Waxa aan shinkeed tiriyo  oon tanran ka dhawraabaa
- Tuludaan sugaayayi  haday taagantahay foole
- Waxaan tiigsi eegaba haday timir dhalaysaaye

- Inkastoo waxaan taami jiray aan tamilay haatan
- Hayee shee allay tiisa tahay talo dhamaanteede
- Mahadana tawaabaa lahoon taas u qirayaaye
- Tacabkii ilaah kaabayaa taaba galayaaaye

- Talankiyo dhibkaan maray waxaan tawstii kaga raysto
- Nolol dhaanta tii baan rabaa inaan tusmeeyaaye
- Waalidkay inaan diif ka tiro waa tu aan rabo e
- Taran iyo awlaadiyo inaan oori helo toosan
- Qorshayahaygu taasuu ahaa taniyo waagiiye
- Tacab iyo allahayoow isii taakuliyo xoogba
- Taban taabadaan wado allaw toosi marinkeeda

## Odhaahyo murti ah (quotes)

1. ‘if you can not fly, then run, if you can not run, then walk, if you can can not walk, then crowl, but whatever you do, you have to keep moving forward.’

Martin luther king

- ‘hadii aanad duuli Karin orad, hadii aanad ordi Karin lugee, hadii aadan lugayn Karin gurguuro, balse si kasta oo aad samaysid ha joojin hor u socodka.’

Martin luther king

2. ‘ I have failed over and over again. that is why I succeed.’

Micheal Jordan

- ‘Waxaan soo guuldarreystay marar badan taasina waa sababta aan u guulaystay.’

Micheal Jordan

3. **‘**failure is simply the opportunity to begin again, this time more intelligently.’

Henry ford

- ‘Guuldarradu waa keliyaata fursad labaad si aad mar labaad u bilawdid balse markan xariifnimo dheeraad ah ayaa lagaa rabaa.’

Henry ford

4. ‘ there is always a better away ……’

Thomas Edison

- ‘Waxaa jira habka fiican oo loo sameeyo – soo hel.’

Thomas Edison

5. ‘I have not failed; I have just found 10,000 ways that did not work.’

Thomas edison

- ‘Maan guuldarraysan waxaan kaliya helay 10,000 oo waddo oo aan shaqaynayn.’

Thomas edison

6. ‘I can accept failure but I can not accept not trying.’

Micheal Jordan

- ‘Anigu waa aan aqbali karaa guuldarada laakiin ma aqbali karo in aan laysku dayin.’

Micheal Jordan

7. ‘I don’t know the key to success, but the key to failure is trying to please every body.’

Bill cosby

- ‘Ma aqaan furaha guusha, laakiin furaha guuldaradu waa isku dayga in qof waliba la raaligaliyo.’

Bill cosby

8. ‘progress is impossible whith out change, and those who can not change their minds can not change anything.’

George Bernard shaw

- ‘Horumarku macquul ma aha isbedel la’aan, kuwa aan maskaxdooda beddeli Karin wax kalena ma beddeli karaan.

George Bernard shaw

9. ‘A goal whithout a plan is just a wish .’

Larry elder

- ‘Yool aan lahayn qorshe waa rabitaan keliya.’

Larry elder

10. ‘In order to succeed, your desire for success should be greater than your fear of failure .’

Bill cosby

- ‘Si aad u guuleysato, rabitaan kaaga guusha waa inuu ka waynaadaa cabsidaaada guuldarada’

Bill cosby

11. If you can dream it, you can do it

Walt Disney

- Hadii aad ku riyoon karto waad sameeyn kartaa

Walt Disney

12. ‘If you want to shine like sun first you have to burn like it.’

Adolf hitler

- ‘Hadii aad rabto inaad u iftiintid sida cadceedda lahow kulayl keed oo kale.’

Adolf hitler

13. ‘Don’t let what you can not do interfere with what you can do .’

John wooden

- ‘Ha ka oggolaan waxyaalaha aanad samayn Karin in ay kaa hor istaagaan qabashada waxyaalaha aad samayn kartid.’

John wooden

14. ‘Success is simple. do what’s right, the right way, at the right time.’

Arnold H.Glasow

- ‘Guushu aad bay u fududdahay samee waxa sax ah, u same sida saxa ah waqtiga saxda ah’

Arnold H.Glasow

15. ‘If you’re presenting yourself with confidence, you can pull off pretty much anything.’

Katy perry

- ‘Hadii aad naftaada kalsooni siisid,waxaad jiidi kartaa ku dhawaad wax walba.’

Katty perry

**16.** ‘Success does not come to you; you go to it.’

Marva colins

- ‘Guushu ku imaan meyso waa inaad adigu u tagtaa.’

Marva colins

17. 'Failure is a success if we learn from it.'

Malcolm forbes

- 'Guuldarradu waa guul hadii aan wax ka barano.'

Malcolm forbes

18. Malcolm forbes 'Effort equals results.'

Dale Carnegie

- 'Dadaalku waxaa uu leg yahay maxsuulka.'

Dale Carnegie

19. 'Discipline is the bridge between goal and accomplishment.'

Jim rohn

- 'Anshaxu waa birishka u dhexeeya yoolka iyo guusha .'

Jim rohn

20. 'if there is no struggle, there is no progress.'

Frederick dougless

- 'Halgan la'aan, ma jiri karo horumar.'

Frederick dougless

## GUNAANADKA BUUGGA

*‘Marka buug la qorayo qaybtee baa u wanaagsan? Dhammaystirka!’*

*_Rick Riordan*

Ugu dambayntii waxaa mahad leh allaah ii suura galiyay in aan dhameeystirro buugan aan ugu magacadaray baadigoobka guusha.

Waxaan mar labaad u mahad celinayaa dhamaan cidii ka qayb qaadatay gacanna igu siisay soo saarista buugan. Intaa kadib Waxaan akhriste rajaynayaa in aad si wanaagsan ugu faa`iiday akhrinta buugan xikmadaysan. kadibna aad mari doontid wadooyinka aan kaga hadlay buugan si aad guul u gaadho.

Waxaan sidoo kale ka raali galinayaa wixii iin ah oo buuggu leeyahay, waxaana diyaar u ahay in aan wax ka badalo khalad kasta oo ku soo arooray buuggan, daabacaada labaad haduu alle idmo.

Fadlan wixii qaladaad aad ku aragto buugan ama toosin ah waxa aad ku soo hagaajisaa:

ADDRESS: KEBELE:18,HN:0223,JIGJIGA, ETHIOPIA.

MOBILE:00251-915-74-85-34 / 09-38891208

E-MAIL: YAXYE24@GMAIL.COM

**Allah ha inaga dhigo kuwo if iyo aakhriba guulaysta.**

**ALLAA MAHAD**

## TIXRAACA BUUGGA


1. Jidka guusha, abdillaahi Mohamed isse, 2014
2. Maree noloshaada, DR.Ibrahim alfiky, turjumaha buuga ismaaciil tukaale cige
3. Tobanka fure ee guusha, DR.Ibrahim alfiky, turjumaha buuga ismaaciil tukaale cige
4. Baraaruji awoodahaaga oo dhis mustaqbalkaaga DR.Ibrahim alfiky, turjumaha buuga ismaaciil tukaale cige
5. Diiwaanka xidigaha maansada, 150 maanso, cabdulqaadir nuur xuseen (maax)
6. You can win, shiv khera
7. Irridaha farxadda, ibraahin aw xasan ismaaciil (waaberi)
8. www.xigasho.com and www.brainyquote.com
9. U Hiili Naftaada (buug gacmeed yar), xamse siciid maxamed (tudhaale)
10. Furuyaasha horumarka, aadam maxamuud maxamed (aadam widhiidh)
11. Sirta ka dambeysa guulaha aasaasayaasha shirkadaha ugu waaweyn aduunka, amr bin Leila.waxaa turjumay, cabdilaahi beershiya
12. Once upon a cow, DR.Camilo cruz
13. Waxaan kaloo tixraacay jaraa`ido iyo maqaallo badan oo ay qoreen aqoon yahano soomaaliyeed kana hadlayo mowduucan.

QODABADA MUHIIMKA AH EE KA FAAIIDAYSTAY BUUGAN KU QOR HALKAN.

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

…………………………………………………………………………………

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

.......................................................................................!

# Waari mayside war ha kaa haro !

**"INTA MAANKU GAAJAYSANYAHAY; GUULI WAA WALI!"**

***_MAXAMMED IBRAAHIM WARSAME (HADRAAWI)***



***'Garwaaqsida naftu waa as aaska guusha, Go'aan gaariduna waa udub dhexaadka guusha.'***

**_Yaxye yaasiin xasan**

**Waxa aan hubaa in maskaxdaada ay ka dhex guuxayaan riyooyin badan oo aad doonaysid in aad fuliso, ka kac hurdada oo bilaw hirgelinta riyooyinkaad adiga oo u kala hormarinaya sida ay u kala muhiimsanyihiin……!**

**Halyey u noqo naftaada !**